

**SAFERWORLD**
PREVENTING VIOLENT CONFLICT. BUILDING SAFER LIVES

# Qabaa'il, Iskuqabsi iyo isu tanaasul

## Udhammaan iyo federaaleynta Galmudug

**Juun 2020**

# Qabaa'il, Iskuqabsi iyo isu tanaasul

## Udhammaan iyo federaaleynta Galmudug

Juun 2020

## Mahadnaq

Warbixintan waxaa qortay Zahbia Yousuf, Muzzamil Abdi iyo Abdi Ali. Cilmi baaristaan oo laga sameeyay Galmudug iyo Muqdisho waxaa Fuliyey Abdi Ali iyo Muzzamil Abdi oo ka mid ah kooxda Soomaaliya ee Hayadda Saferworld. Waxaan sidoo kale jeclaan lahayn in aan mahadnaq aad u ballaran u celinno kalkaaliyeyaashii cilmi baarista intii xog uruurintu socotay.

Kooxda cilmi baarayaashu waxay u mahad celiyaan dhamaan ka qeybgalayaashii waqtigooda siiyay isla markaana la wadaagay khibradooda iyo aqoontooda intii wareysigu socdeen.

Tani waa soouruurinta warbixintii weyneyd, oo looga akhrin karo ayadoo Ingiriisi ah oo tafaatirsan halkan: https://www.saferworld.org.uk/resources/publications/1257-clans-consensus-and-contention-inclusion-and-federalism-in-galmudug

UKaid
from the British people

Saferworld, Conciliation Resources iyo International Alert waxay iska kaashanayaan barnaamij cilmi baaris oo seddex sano ah, Iskaashiga oo loogu magacdarey Cilmi baarista Nabadda ayaa cadeymo iyo casharro u soo bandhigtaa kuwa ku lug leh dejinta siyaasadaha iyo xirfadleyda sida loo taageero nabadda, isbedel loo dhan yahay oo ka dhaca meelaha ay colaaduhu saameeyeen. Waxaa maalgeliyey UK aid ee dawladda UK, cilmi baarista waxay diiradda saarayaa horumarka dhaqaalaha, geeddi-socodka nabadda, dhaqamada iyo waxyaabaha ku saabsan jinsiga ee keeno khilaafaadka.

© Saferworld, Juun 2020. Xifdinta xuquuqda daabacaadu. Qayb ka mid ah daabacaaddan lama soo saari karo, lagumana kaydin karaa nidaamka dib u soo celinta ama lagu kala qaado nooc kasta, ama qaab elektiroonig ah, makaanik, koobiyeyn, duubis ama si kale, iyada oo aan la helin ogolaansho buuxda. Saferworld waxay soo dhaweynaysaa oo dhiirigalinaysaa ka faa'iideysiga iyo faafinta daabacaddan.

**Sawirka bogga ugu sarreeya: Ergo u codeyneyso xubnaha aqalka hoose ee baarlamaanka federaaleed ee Adaado, Soomaaliya 29kii Nofeembar 2016 inta ay socoto howlaha doorashada.**

© AMISOM

# Shaxda mawduuca


**Soo ururin** i

Waxyaabaha muhiimka ah ee ka soo baxay cilmi-baadhista (*Key findings*) ii

Arimaha siyaasiga ah ee tixgellinta leh (*Policy considerations*) iii

1 **Federaaleynta Galmudug** 1

1.1 Hordhac 1

1.2 Dhismaha dawlad goboleedka Galmudug 3

1.2.1 Wejiga 1: 2014–16 4

1.2.1 Wejiga 2: 2016–18 4

2 **Dhismaha dawlad goboleedka Galmudug: ka wada hadalka awoodda iyo hay'adaha siyaasadeed** 9

2.1 Isutanaasulaka 9

2.2 Wax u dhexeeya isu tanaasul iyo isku-qabsiga: ku biirinta kooxaha hubaysan ee aan dawliga ahayn (*incorporating a non-state armed group*) 10

2.3 Taageerada debedeed ee dhismaha dawlad goboleedka 12

3 **Ballaadhinta ka qaybgalka siyaasadeed** 15

3.1 Qodobbada saameeya xulashada 15

3.2 Fursadaha ka qaybgalka siyaasadeed: dhallinyarada 16

3.3 Fursadaha ka qaybgalka siyaasadeed: Haweenka 16

3.4 Fursadaha ka qaybgalka siyaasadeed: qabiilada laga tiro badan yahay 17

3.5 Dadka dalka gudihiisa ku barokacay 18

4 **Muxuu adiga kuu qabtay nidaamka federaalka ah? Is-bedelka amni, adeeg bixin iyo fagaaraha bulsho** 21

4.1 Dawlad goboleedka Galmudug: qaabka iyo xilka 21

4.2 Khilaafka iyo amaanka (*Conflict and security*) 22

4.3 Bixinta adeegyada 24

4.4 Udhaq-dhaqaaqa bulsho (*Civic activism*) 24

5 **Gabo-gebo** 29




**Wadada soo gasha magaalada Adaado, Galmudug.**

**© Mohamed Dhagacade**

# Soo ururin (*Executive summary*)

**Warbixintani waxa ay ka turjumaysa sida nidaamka federaalka ah ee Soomaaliya uu u kobcay, iyada oo si gaar ah u eegaysa waayo-aragnimada iyo duruufta Galmudug oo ah dawlad Goboleed xubin ka ah federaalka Soomaaliya. Waxa ay warbixintu qiimaynaysaa ilaa xadka laga gaadhay faa'iidada la aaminsan yahay inay leedahay maamul daadejinta – oo ah masuuliyiinta oo ku dhow ayna xisaabin karaan dadweynuhu, adeegyada guud oo horumara, iyo caddaalad iyo amaan si degdeg ah loo helli karo. Waxa ay sidoo kale dersaysaa in nidaamka federaalku uu ibo-furay fursaddo lagu helo metelaad siyaasadeed. Waxa warbixinta ku jira tallooyin loo jeedinayo Soomaalida iyo ururada iyo deeq-bixiyayaasha caalamiga ah.**

Warbixintu waxa ay heshay in maamul daadejintu aanay u ahayn ciwad-cellin fudud bulshoooyinka kala daatay (*fragmented societies*). Nidaamka federaal ee Soomaaliya waxa uu ku dhisan yahay qaab-dhismeed qabaail balse sidoo kale waa mid aan kala cadayn (*ambiguous*). Kala caddaan la'aanta oo si wax-ku-ool ah loo dhigay (*constructive ambiguity*), waxa ay ka muuqataa agabka federaal ee sharci iyo dastuur, waxa ay caqabad ku tahay dawlad-dhiska sababta oo ah waxa ay u baahan tahay in in si joogto ah oo dabo-dheer ay dhinacyada awoodda hayaa uga wada hadlaan shuruucda iyo habraacyada maaliyadeed iyo siyaasadeed ee federaalka.

Lix sanadood ayuu socday dhismaha federaal ee Galmudug, islamarkaana waxa jira calaamado togan: waxa laga aasaasay degmooyinka qaar qaab-dhismeedyo maamul; waxa horumar laga gaadhay amaanka guud; adeegyada qaarkood waxa laga heli karaa heer degmo oo hoos ayay uga daadegeen heer qaran. Isu tanaasul iyo dooddu waa aasaaska ay ku taagan tahay nidaamka federaal ee Galmudug. Geedi-socodkii Cadaado ee 2015 waxa uu ahaa mid aan hore loo arag noociisa oo isku keenay 11 qabiil oo degan gobolada Galgaduud iyo Koonfurta Mudug si ay uga wada hadlaan nidaamka awood qaybsi ee aasaaska u noqonaya Dawlad Goboleedka cusub ee Galmudug. Waxa inayna muhiim ah in Galmudug ay aqbashay ururka Suufiyada ah ee Ahlu Sunna Wal Jamaaca oo qayb ka noqday qaab-dhismeedkeeda siyaasadeed.[1]

Dejinta nidaamka federaalku waa hawl-gudasho aad u culus lacag ahaan iyo saad ahaanba (*logistically*), oo u baahan khayraad aad u balaadhan (lacag ahaan iyo awood ahaan ba) taas oo lagu bartilmaameedsanayo kaabayaasha hay'adeed ee heer qaran, heer gobol iyo heer deegaan. Marka Soomaaliya la eego, su'aashu hadda maaha in federaalka lagu dhaqmi karo iyo in kale, balse waydiintu waxa weeye sidee ayay tahay in loo dhaqangelliyo. Bulshada rayidka ah ee Soomaaliyeed door muhiim ah ayay ku leeyihiin inay si xirfadaysan u abaabulaan doodda iyo wacyigellinta dadwaynaha ee ku saabsan nidaamka federaalka oo ah kuwo aad loogu baahan yahay, iyaga oo dadwaynaha gaadhsiinaya geedisocodka federeelaynta; qaabaynaya doodaha iyo aragtida dadwaynaha iyo inay fudaydiyaan wada hadaladda ku saabsan isla-xisaabtanka iyo ka qaybgalka micnaha leh; iyo inay la shaqeeyaan masuuliyiinta dawladda si loogu awood siiyo is-bedel. Cidaha iskaashiga lala leeyahay ee caalamiga ah (*international partners*) ee doorka muhiimka ah ka ciyaaray dhisidda dawlad goboleedka Galmudug iyaga oo taageero siinayay wada hadalladda siyaasadeed iyo kaabayaasha, waxa ay iyana leeyihiin door muhiim ah oo ay gacan kaga gaysan karaan sidii la isku waafajin lahaa ujeeddada muddada dhow ee ah in la aasaaso nidaam awood-qaybsi oo shaqaynaya iyo ujeeddada muddada dheer ee ah dhisidda hay'ado waara, degan oo loo dhanyahay (*sustainable, stable and inclusive institutions*).

# Waxyaabaha muhiimka ah ee ka soo baxay cilmi-baadhista (*Key findings*)

## Bixinta Adeegyada (*Service provision*)

Nidaamka federaalku waxa uu keenay in la abuuro qaab-dhismeedyo maamul oo awood u yeelan kara inay keenaan adeegyada, ay ka midka yihiin baasaboorada, ruqsadaha (shatiyada) gancsi, meelo ku dhow dadwaynaha iyaga oo ka dhigaya adeegyadaas kuwo laga helli karo degmooyinka. Haseyeeshee, adeegyo badan oo ay ka mid yihiin caafimaadka, biyaha iyo waxbarasahda, Dawladda Xubinta ka ah Federaalku waxa ay ku tiirsan tahay inay bixiyaan adeegyadaas masuuliyiin iyo hay'ado kale. Maamulada degmooyinka ayaa ah kuwa ugu dhow dadwaynaha, islamarkaana laba gole-degaan ayaa ka jira tobanka degmo [ee dawlad goboleedku ka kooban tahay], islamarkaana ururrada aan dawliga ahayn ayaa si wayn qayb uga ah bixinta adeegyada biyaha, is-gaadhsiinta iyo daryeelka caafimaad.

## Siyaasad loo dhan yahay (*Political inclusion*)

Samaynta hay'ado federaal waxa ay balaadhisay fagaaraha si siyaasadda looga wada muuqdo taas oo xaqiijisay in qabiilada waawayn iyo kuwa yaryar ay yeeshaan metelaad siyaasadeed. Marka habkan laga leexdo – sida samaynta kooxda hubaysan ee la sheegay in aanay qabiilka ku dhisnayn ee Ahlu Sunna Wal Jamaaca – waxa sii dabo dheeraada is-mariwaaga siyaasadeed iyo xasilooni darada, taas oo su'aallo gelisa sii jiritaanka heshiiska siyaasadeed. Qoondada haweenka (oo aan weli xeerarka lagu qorin) ayaa lagu heshiiyay, haseyeeshee ka qaybgalka siyaasadda ee haweenka, dadka laga tiro badan yahay iyo dhallinyarada waxa guul badan laga dhaliyay heer degmo, oo ah meesha ay gaadhsiisan tahay u doodista bulshada rayidk aha.

## Isu tanaasulka iyo Iskuqabsi

Isu tanaasulku waa astaanta nidaamka federaalka, balse waxa ay u baahan tahay in si joogto ay u soo farogeliyaan deeq-bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah si ay u maareeyaan, khayraad ugu bixiyaan oo ay u taageeraan. Waxa la sheegay in Galmudug lagu dhisay 'hab loo wada dhan yahay' oo isbahaysi ah, taas oo si guul ah u keentay in qabiiladda awoodda badan leh ay ka mid noqdaan, islamarkaana waxa ay keentay inay u noqoto wax ay ku sii negaan karaan qabiiladaasi waawayni nidaamka federaalka ah. Si la mid ah hababka kale ee siyaasadeed, kooxo 'laga tiro badanyahay ayaa laga tegay si loo xasiliyo ka mid noqoshada kuwa waawayn. Haseyeeshee, waxa kor u kacday xiisadda ka dhaxaysa dawladaha xubnaha ka ah federaalka iyo dawladda federaalka, iyada oo kuwa awoodda haya (*powerholders*) ay u tartamayaan faa'iidada la socota nidaamka federaalka ah.[2]

## Qaab iyo Labalabyn (*Structure and ambiguity*)

Galmudug oo ka kooban hal gobol iyo badh (oo ka duwan habka labada gobol) waxa ay muujisay hab ku dhisan wax-tarnimada ee aan ku dhisnayn in la raaco nidaamka dejisan (*consistency*). Waxa jira kala

duwanaanasho u dhexeeya mabaadida dastuuriga ah iyo dhaqanka, taas oo ka turjumaysa in aanay kala cadayn sida ay tahay in loo sameeyo dawlad xubin ka ah federaalka; sida loo maaraynayo xuduudaha; doorarka, xilalka iyo awoodaha kala duwan ee ay leeyihiin dawladaha xubnaha ka ah federaalka marka loo eego dawladda federaalka ah; sida loo wadaagayo dakhliga iyo khayraadka dabiiciga ah, iyo sidoo kale qoondaynta miisaaniyadda; iyo qaybinta deeqaha lacageed iyo caawimada ammaan ee deeq-bixiyayaasha laga hello. Hay'adaha federaal ee hada jira ee loo sameeyey inay ka gar-naqaan xuduudaha, oo sidoo kale kala cadayn lahaa meelaha lagu muransan yahay, kana garqaadi lahaa muranada ka dhexeeya dawladda federaalka ah iyo dawladaha xubnaha ka ah federaalka, ayaan taageero ka haysan dawladda federaalka ah si ay si waxtar leh ugu shaqeeyaan.

# Arimaha siyaasiga ah ee tixgellinta leh (*Policy considerations*)

## Awoodd-siin hay'adeed iyo bixinta deegyada (*Institutional capacity and service provision*)

Talo ku socoto deeq-bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah:

- Ka taageera dawladda federaalka ah dejinta iyo khayraad u hellidda dhismaha qaab-dhismeedyada iyo awoodaha maamul ee heer federaal iyo degmo.
- Qiimeeya sida adeegyada looga bixiyo goobaha cayiman, si loo qiimeeyo waxtarkooda iyo meelaha u banaan in la kaabo ee qabyadu ka jirto.
- Ku xidhiidhiya taageerada la siiyo dawladaha xubinta ka ah federaalka ballan qaadyada iyo habab ay xubnaha Baarlamaanku awood ugu yeellan karaan inay waqti la qaataan dadka soo doortay ee degen meelaha ku dhow.
- Ka dhig qayb ka mid ah taageerada la siiyo dawladaha xubnaha ka ah federaalka in xildhibaanadda baarlamaanku ay awood u yeeshaan inay waqti la qaataan dadka soo doortay xilliyada aan lagu jirin doorashada.
- Taageera barnaamijyada wacyigelineed ee hay'adaha dawladeed ee bixiya adeegyada amaan, iyo in booliisku uu gaadho oo la xidhiidho dadwayanaha.
- La shaqeeya ururada haweenka ee maxalliga ah si loogu doodo in la hello saraakiil haween ah oo u qaabilsan xidhiidhka iyo iskaashiga dadwaynaha kuwaas oo qiimayn kara walaacyada, baahiyaha iyo fal-cellinta amaan ee bulshadu qabto.
- Siiya ururada bulshada rayidka ah xog iyo tabobarro ku saabsan hababka, qaab-dhismeedyada iyo doorarka ay leeyihiin nidaamyada iyo hay'adaha federaal, si loo xoojiyo doorkooda isla-xisaabtan.
- Taageera oo dhiirigeliya dhaqanka ku shaqaynta dastuurka (*constitutionalism*) ee heer federaal iyo heer maamul goboleed.

Talo ku socota dawladaha xubinta ka ah federaalka iyo maamulada degmooyinka:

- Dejiya qaab heer degmo ah oo horumarineed si loo aqoonsado meelaha gaabisku ka jiro (khayraad ahaan, awood ahaan iyo siyasaad ahaan) islamarkaana dejiya mudnaano iyada oo lala shaqaynayo ururada bulshada ka tirsan (*community based organisations*), hogaamiyayaasha beelaha iyo saraakiisha degmooyinka.
- Dawlad goboleedka Galmudug waa inay xidhiidh la samayso xubnaha baarlamaanka iyo gudiyada oday dhaqameedka xulista si loo xaqiijiyo in xogta ku saabsan dejinta siyaasadda horumarineed ee dawlad goboleedka iyo arimaha baarlamaanku ay yihiin kuwo ay helli karaan maamulada degmooyinku.
- Samaynta golayaasha cusub ee degmooyinka waa inay dhiirigeliyaan in ay ka wada qayb noqdaan dhamaan qabiilada/jifooyinka waawayn iyo kuwa yaryar ee ku nool deegaanka.
- Xilli hore bilaw inaad la shaqayso gudiyada oday dhaqameedka ee xulista iyo sidoo kale ururada bulshada rayidka ah iyo xildhibanaanada baarlamaanka si loo abuuro isla xisaabtan iyo korjoogtayn ay yeeshaan xildhibaanada baarlamaanku.
- Xildhibaanadu waa inay si firfircon u dhisaan xidhiidh ay la yeeshaan meelaha laga soo doortay. Tan waxa ku jiri karta inay kulammo heer deegaan la yeeshaan si ay ula wadaagaan bulshada xogta ku saabsan doodaha baarlamaanka iyo inay ka hellaan bulshada tallooyin.

## Udhammaan (*Inclusion*)

Talo ku socoto deeq bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah:

- Qiimayn ku sameeya sida ugu suurtagalsan ee la isugu dheelli tiro karo mudnaanaha ka qaybgalka loo dhan yahay ee hal dhinac (tusaale ahaan sida qabiilada) iyo kuwa kale (tusaale ahaan haweenka).

- Qiimayn ku sameeya sida geeddi-socodka maamul daadejintu uu u waafaqsan ayahay ama uu u majo xaabinayo hiigsiga maamul ee muddada dheer (*longer-term governance aspirations*) – tusaale ahaan, "doorasho hal qof hal cod ah).
- Taageero siiya aasaasidda fagaare wada-hadal ay ku yeellan karaan haweenka iyo dhallinyarada degmooyinka kala duwan ku nool ee heer dawlad goboleed iyada oo la tilmaamayo oo la aqoonsanayo walaacyada ay wadaagaan.

Talo ku socota dawladaha xubinta ka ah federaalka iyo maamullada degmooyinka:

- Taageera barnaamijiyo wacyigelineed oo lagu wajahayo takoorka ay la kulmaan qabiilada la riixo (*excluded clans*), taas oo ay ka mid yihiin sidii loo heli lahaa ka qaybgal siyaasadeed, taageero ay ka helaan bulshada rayidk ah, iyo in xidhiidh lala sameeyo oday dhaqameedka iyo culimadda diinta.
- Sameeya nidaam taageero oo keena xeer heer degmo iyo gobol ah oo ka dhan ah takoorka lagu hayo qabiilada la riixo, iyo ansixinta xeerar ogol ka qaybgalka haweenka ee siyaasadda.
- Kala cadeeya maqaamka dadka dalka gudihiisa ku barokacay ee mudo dheer ku noolaa goob cayiman.

Talo ku socoto ururada bulshada rayidk ah (*CSOs*):

- Raadiya fursado lagu abuuri karo is-bahaysiyo ururro bulsho oo ka kala socda degmooyin kala duwan si loo dejiyo u doodis laga siman yahay oo laga yeesho arimaha la wadaago (*common issues*).
- Dhiirrigeliya in beelaha laga tiro badan yahay ay qayb ka noqdaan hawlaha socda, islamarkaana taageera inay yeeshaan door hogaamineed.
- Sameeya wacyigellin islamarkaana wadaagga waxyaabaha laga bartay dadaaladda u doodista ee laga sameeyey degmooyinka kala duwan, taas oo ay ka mid yihiin casharada laga bartay baarlamaan-humaagga haweenka (*women's shadow parliaments*).
- Sameeya barnaamijo wacyigelineed oo raadiya hababka lagaga hortegi karo fekerrada qaldan ee laga haysto qabiilada la riixo.
- La shaqeeya masuuliyiinta, bilawga hore heer degmo, iyo gudiyada oday dhaqameedyada si loo kobciyo la xisaabtanka saraakiisha iyo xubnaha baarlamaanka, iyo in la xoojiyo xidhiidhka ka dhexeeya masuuliyiinta iyo ururada bulshada ku dhisan, taas oo ay ka mid tahay sida ugu wanaagsan ee ay masuuliyiintu uga falcellin karaan islamarkaana ay qayb uga dhigi karaan go'aan qaadashadooda walaacyda ay qabto bulsada rayidka ah.

## Isutanaasulka

Talo ku socoto deeq bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah:

- Maalgelliya arimaha muuqda iyo kuwa fudud labadaba: taageer mashaariicda muuqda ee kaabayaasha dhaqaale ee kobciya in si fudud uu xidhiidh iyo wada hadal u dhex maro kuwa awoodda siyaasadeed gacanta ku haya (*political elites*) ee arimaha faa'iidada iyo danaha guud leh – tusaale ahaan wadooyinka iskaga gudba dawladaha xubnaha ka ah federaalka.
- Deeq-bixiyayaashu waa inay iskaashadaan si ay u dejiyaan ujeedooyin is-haysta oo ay wadaagaan – mudada gaaban iyo mudada dheer labadaba – ee dhamaan dadaalada debedeed si loo taageero geedi-socodka wada-hadalka oo ka qoto dheer kana fogaan arag dheer in meel la isugu keenno kuwa awoodda hay.
- Dib-u-qaabayn ku sameeya dadaalada iyo mudnanaha si loo taageero isu tanaasul dhexmara dawladda federaalka ah iyo dawladaha xubinta ka ah federaalka si loo xaqiijiyo in nidaamka federaalku shaqeeyo – illaa hada waxa loogu koobnaa xidhiidhka ka dhex socda dawladaha xubnaha ka federaalka dhexdiisa si loo xoojiyo marshuuca federaalka.
- Dejiya hab lagu aqoonsado oo lagu sameeyo digniinaha xiliga hore ah (*early warning*) si looga hortaggo in hay'adaha amni lagu riixo inay qayb ka noqdaan isku dhac dhex mara kooxaha siyaasadeed, taas oo ay ka mid tahay in la qaado talaabooyin lagu dhisayo isku kal-soodnaanta ka dhex jirta ciidamada amaanka ee dawladda federaalka ah iyo dawladaha xubnaha ka ah federaalka.
- Deji nidaam lagu aqoonsado oo lagaga qaybgelliyo dadka aan siyaasadda ku jirin (*non-political*) dadaalka dhisidda isu tanaasulka, sida xubnaha ururrada bulshada rayidka ah, oday dhaqameedka, haweenka iyo ganacsatada saamaynta iyo waayo aragnimada u leh fudaydinta wada-hadal ka dhaca goobo cayiman.

## Taageerista in wax la kala cadeeyo

Talo ku socoto deeq bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah:

- Taageer in lagu sameeyo hab lagu kala ogaanayo siyaasadaha iyo hay'adaha hada jira – sida Gudida Doorashooyinka iyo Xuduudaha – ee doorka ku leh kala cadaynta habraacyada federaal, islamarkaana kala shaqeeya dawladda federaalka iyo dalwadaha xubnaha ka ah federaalka in la aqoonsado marinada lagu xaqiijinayo in cid waliba xilkeedii ka soo baxday.

- Taageer in la sameeyo hannaan korjoogtayn oo laga hirgelliyo baarlamaanka dawladda xubnaha ka ah federaalka iyo heer degmo ee qoondayna miisaaniyadda, taas oo ay ka mid tahay inay metelaad yeeshaan cid ka socota gudiyada oday dhaqameedka ee xulista iyo ururada bulshada rayidka ah.

Talo ku socoto dawladda federaalka ah iyo dawladaha xubnaha ka ah federaalka:

- Mudnaanta siiya jidwal lagu dhamaystirayo dib u eegista iyo wax ka bedelka dastuurka, kaas oo si cad loogu cayimo wax la qabanayo mudo kasta, iyo in la sheego fursadaha ay u leeyihiin dawladaha federaalka xubnaha ka ah inay ka qayb qaataan. Tani waa inay xaqiijisaa in qodobada iyo wax ka bedelku ay yihiin kuwa kala cadeeya doorarka ay kala leeyihiin dawladaha xubnaha ka ah federaalka iyo dalwadda federaalka, iyo sidoo kale doorarka gudiyada dastuur ee madaxa banaan.
- Dawladaha xubnaha ka ah federaaku waa inay la shaqeeyaan dawladda federaalka (oo iyana ay la shaqayso dawladaha xubnaha ka ah) si loo cadeeyo heerka iyo hababka lagaga heshiinayo xidhiidhka dawladaha xubinta ka ah federaalku ay la yeelan karaan dalalka deriska ah; tusaale ahaan arimaha xuduudaha la wadaago iyo iskaashiga amaanka xadka la wadaago.
- Inay aqoonsadaan caqabadaha hortaagan wada hadalka ku saabsan xoojinta wadaagista dakhliga iyo xeerarka ku saabsan qoondaynta miisaaniyadda – ee ka dhexeeya dawladaha xubinta ka ah federaalka iyo dawladda federaalka ah iyo dawladda federaalka ah dhexdeeda.

Talo ku socota ururrada bulshada rayidka ah:

- Ururrada bulshada rayidka ah iyo ururrada bulsha ku tiirsan waa inay fulliyaan wacyigellin iyo aqoon baahin ay ku gaadhayaan dadwaynaha, taas oo ku saabsan geedi-socodka, qaab-dhismeedka iyo doorarka nidaamyada iyo hay'adaha federaal ay leeyihiin.
- U qaabeeya dadaaladda socda ee ku saabsan geedi-socodka dimoqraadiyadda, amaanka iyo caddaaladda, si waafaqsan nidaamka federaalaynta si loo taageero kor u kac ku yimaadda doodaha dadwaynaha ee ku saabsan in si waxtar leh looga fulliyo federaalka heer qaran iyo heer gobolba.

## Qoraalo kooban

1 Ahlu Sunna Wal Jamaaca waa koox hubaysan oo sanadkii 1991 ay aasaaseen Muslimiin Sunni ah oo Suufiya ah. Iyaga oo inta badan ka hawlgala Galmudug iyo gobolka Hiiraan oo ka tirsan HirShabeelle, Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa ay noqotay koox muhiim u ah la dagaalanka Shabaab iyo sidoo kale mid is-bahaysi aan xooganayn la leh dawladihii ku meel-gaadhka ahaa ee Soomaaliya.

2 Cheng C, Goodhand J, Meehan P (2018), 'Synthesis Paper: Securing and Sustaining Elite Bargains that Reduce Violent Conflict', Stabilisation Unit, April.




**Shaqaala ka tirsan gudiga doorashoyinka oo diiwaan gelinaya ergo inta lagu guda jiro doorashada xubnaha Aqalka Hoose ee baarlamaanka federaalka Adaado 29 Nofeembar 2016.**
**© AMISOM**

# 1

# Federaaleynta Galmudug


## 1.1 Hordhac

Waxa lagu doodi karaa in Galmudug uu ahaa gobolka geedi socodka samayntiisu ay ahayd ta ugu adag dhamaan dawlad goboleedyada Soomaaliya. Waxa loo aqoonsaday dawlad xubin ka ah faderaalka sanadkii 2015, balse waxa si rasmi ah loo mideeyey maamulkeeda sanadkii 2018. Geedi-socodka maamul dhisid (ee socda) waxa uu siyaabo badan tusaale ugu yahay marshuuca federaalaynta ee kakan ee dalka – kaas oo doonaya inuu ka gudbo dabinada dawladdii hore ee dhexe (*centralised state*), isu keenista qabiillo tartansan (qabiilka oo ah ururka bulsho ee ugu wayn dalka),[3] in loogu qaybiyo awoodda siyaasadeed qabiil kasta hab ay heshiis ku yihiin, iyo in la yareeyo fursadaha iyo sababaha keeni kara is-maan-dhaaf gacan ka hadal wata.

Sanadkii 2020, Galmudug waxa ay bilawday inay ka ciyaarto door muhiim ah siyaasadda qaran, iyada oo marti gelisay hogaamiyayaasha dawladdaha xubinta ka ah federaalka oo ku kulmay Dhuusamareeb si ay uga wada hadlaan habka iyo qaabka doorasho ee loo isticmaali karo doorashooyinka qorshaysan.

Haseyeeshee, wadada Galmudug ay ku noqotay xubin ka tirsan dawladaha xubinta ka ah federaalku ma ahayn mid sahlan oo si toos ah u dhalatay. Warbixintu waxa ay ka hadlaysa sida dawlad goboleedka Galmudug loo sameeyey iyo siyaabaha looga wada hadlay samaynteeda. Waxa ay sidoo kale eegaysaa raadka nidaamka federaalku uu ku leeyahay dadwaynaha ilaa hada, gaar ahaan xagga amaanka, is-dhexgalka bulsho, bixinta adeegyada asaasiga ah iyo fursadaha ay kooxaha kala duwan u heleen inay ka qayb noqdaan hay’adaha iyo geedi-socodyada siyaasadeed ee cusub, iyo saamaynta ay leeyihiin. Illaa xad intee leeg ayaa lagu guulaystay faa’iidada la filayay in laga hello maamul daadejinta? Nidaamka federaalku miyuu ibo furay goobo iyo habab ka qaybgal siyaasadeed oo loo wad adhan yahay, miyuu keenay xidhiidho isku dhow oo ka dhexeeya dadwaynaha iyo dadka siyaasiyiinta ah iyo kuwa leh awoodda siyaasadeed, islamarkaana miyuu ugu danbayntii keenay deegaan wanaagsan oo u fiican nabadda iyo xasiloonida ee heer gobol? Khibradda Galmudug, oo dabcan leh waxyaallo u gaar ah iyo duruufo kakan oo iyada ku kooban, hadana waxa laga faa’iidi kara faham hannaanka siyaasadeed ee loogu guurayo dawlad goboleedyo federaal ah iyo dadaalka wax lagaga qabanayo waxyaalaha khilaafka dabada ka riixa ee qotoda dheer (*deep-rooted conflict drivers*).

## Dowladaha xubnaha ka ah federaalka Soomaaliya ee hadda jira




Xuduudaha, midabada, iyo wixii macluumaad ah ee kale ee ka muuqda khariiradan micnaheedu ma aha go'an sharciyeed ku saabsan dhulkan, ansaxintooda ama aqbalida soohdimahaas.

**Isha xogta (xogta waa la beddelay): Bangiga Adduunka**

Maamul daadejintu waa hannaan ay hore u soo martay taariikh ahaan Somalia kadib markii ay xorriyadda qaadatay; oo lagaga wada hadlay ama lagu xusay maamuladii siyaasadeed ee kala danbeeyey oo ay ka mid yihiin Dastuurkii 1960 iyo nidaamkii Maxamed Siyaad Barre. Tan iyo 1991kii, waxa sii xoogaystay dadaalka loogu jiro maamul daadejinta – kaas oo ay taageereen dalalka deriska ah ee Itoobiya iyo Kiiniya[4] iyo bulshada caalamka guud ahaan.[5] Inkasta oo nidaamka federaalka lagu heshiiyay mabda'a ahaan intii lagu jiray Shirkii Qaran ee Dib-u-heshiisinta Soomalia ee ay hogaaminaysay IGAD ee dhacay 2002–2004 (oo sidoo kale loo yaqaan geedi-socodka 'Mbagathi'), waxa uu qaab yeeshay kadib markii lagu heshiiyay Dastuurka Ku-meel Gaadhka ah ee 2012. Nidaamka federaal ee ku qoran dastuurka ayaa loo asteeyey inuu noqdo hab-maamulka Soomaaliya ee mustaqbalka islamarkaana waxa lagu tilmaamay in la abuuro dawladda federaalka ah ee Soomaaliya.[6] Waxa lagu xusay in awoodda loo daadejiyo dawladaha xubinta ka ah federaalka (oo ka kooban xukuumadda dawladda xubinta ka ah federaalka iyo baarlamaanka) halka dhinaca kale la dhiirigelinayay iskaashiga, iyada oo la rajaynayo in la is-waafajiyo awoodda iyo isku dheellitirka ka dhexeeya badhtamaha iyo darafyada (*the centre and the periphery*). Habkani waxa uu guud ahaan ku dhisan yahay isu tanaasul dhexmara hogaamiyayaasha heerarka kala duwan ee dawladda (qodobka 51 ee Dastuurka Ku-meel gaadhka ah ee 2012). Dastuurka Ku-meel gaadhka ah ee 2012 waxa uu sheegayaa in laba ama in ka badan oo ah gobolladii (ka horeeyey 1991) ay si iskood ah isugu iman karaan si ay u abuuraan dawlad xubin ka ah federaalka, halka uu ka tilmaamay in tirada iyo xuduudaha dawladaha xubinta ka ha federaalka uu go'aaminayo Golaha Shacabka (Golaha Hoose ee Baarlamaanka Federaalka) (qodobka 49). Waxa uu waajibinayaa in la sameeyo Gudida Xuduudaha iyo Federaalka, oo ah hay'ad madaxbanaan oo u xilsaaran qiimaynta sharcinimada iyo suurtagalnimada dawlad goboleedka cusub ka hor intaan la ansixin.

Warbixintani waxa ay ku sallaysan tahay cilmi-baadhis laga sameeyey dawlad goboleedka Galmudug iyo Muqdisho intii u dhaxaysay Janaayo iyo Noofembar 2019. Cilmi-baadhista waxa laga sameeyey shan goobood: magaalooyinka Cadaado, Dhuusamareeb, Caabudwaaq, Koonfurta Gaalkacayo iyo Xeraale. Dadka ka qaybgalay cilmi-baadhista oo dhamaa 200 oo qof waxa ku jiray shaqaale ka tirsan deeq bixiyayaal, ururo aan dawli ahayn oo maxalli ah, saraakiil dawladeed, oday dhaqameedyo, xubno ka tirsan baarlamaanka, dad dalka gudihiisa ku barkocay, haween iyo dhallinyaro, iyo dad culimada diinta ah iyo ganacsato ka socda qabiiladda xoogga waawayn iyo qabiilada laga tiro badan yahay (kuwaas oo ka koobnaa rag iyo dumar, hablo iyo wiilal). Waxa goob walba laga qabtay kooxo meel la iskugu keenay si su'aalo loo waydiiyo oo dhamaantood haween ah (*women-only focus group discussions*), islamarkaana guud ahaan ka qaybgalayaasha waxa haween ahaa boqolkiiba 40 halka ay boqolkiiba 60 ka ahaayeen rag. In laga qabto cilmi-baadhis dalka Soomaaliya dhexdiisa waa mid si gaar ah u leh caqabo, taas oo ay la socoto khataro waawayn oo amni iyo edebta cilmi-baadhista la xidhiidha (*ethics*) oo ay wajahaan dadka ka qaybgalaya iyo cilmi-baadhayaashu. Si loo xaqiijiyo in muunadda (*sample*) la qaadanayo ay tahay mid metesha dhamaan degmooyinka kala duwan, waxa la siiyay taxadar si loo xaqiijiyo in kooxaha bulsho ee kala duwan ay ka qaybqaataan iyada oo habka muunadda loo qaadanayo uu ahaa mid isku mid ah goobaha oo dhan.

Cilmi-baadhistu waxa ay fiiro gaar ah u yeelatay haweenka, dhallinyarada, qabiilada laga tiro badan yahay, iyo dadka dalka gudihiisa ku barokacay. Waxa jiray caqabado kale oo soo foodsaaray xog ururinta maadama oo meelo ka mid ah Galmudug ay maamusho al-Shabaab oo aad halis tahay in la tago – kuwaasi waxa ay u muuqataa inay yihiin dhinaca koonfureed ee Galmudug oo ay ka mid yihiin magaaloyinka Ceelbuur, Ceeldheer iyo Xarardheere, inkasta oo ay adag tahay in si rasmi ah loo xaqiijiyo. Sidoo kale amaanku maaha mid aad la isugu hallayn karo meelaha miyiga ah. Sidaas darteeed, cilmi-baadhayaashu waxa ay isku koobtay meelaha magaalooyinka ah iyo meelaha tuullooyinka sida fiican loo degan yahay ah (*pre-urban areas*) ee Galmudug.[7]

## 1.2 Dhismaha dawlad goboleedka Galmudug

Dawlad goboleedka hadda jira waxa lagu sameeyey laba weji:

i. 2014–2016: waxa wada-hadallo ku dhex mareen Cadaado 11 qabiil si loo sameeyo maamul.

ii. 2016–2018: wada-hadallo ayaa dhexmaray Madaxwaynaha dawlad goboleedka Galmudug iyo, ugu horayntii dawladda Puntland si loo calaamadeeyo xadka labada dawlad goboleed, iyo markii labaad Ahlu Sunna Wal Jamaaca si loogu soo daro maamulka.

### 1.1.1 Wejiga 1: 2014–16

Isaga oo ka kooban qaybo ka mid ah Gobolka Galguduud iyo koonfurta Mudug, dalwad goboleed hore ayaa sanadkii 2006 ka dhigatay koonfurta Gaalkacayo caasimad (maadama oo waqooyiga Mudug ay sheegatay Puntland markii la aasaasayay sanadkii 1998, oo waxa caasimad u ahaa waqooyiga Mudug, woqooyiga Gaalkacayo). Maamulkaasi awood badan ma uu lahayn, islamarkaana dastuurka Somalia ee ku-meel gaadhka ah ee 2012 ayaa keenay dardar cusub iyo dadaal lagu midaynayo qaybo kala duwan oo laga dhigo "Dawlad Goboleedka Gobolada Dhexe'. Sanadkii 2014, wakiillo gobol iyo dawladda federaalka ah ayaa saxeexay heshiis rasmi looga dhigayo maamulka, kaas oo ay taageertay gudi farsamo oo u xilsaarnayd inay diyaariso khariirad islamarkaana fudaydiso geedi-socodka lagu abuurayo maamul ku meel gaadh ah.[8]

Wada hadalada ka dhacay April 2015 Cadaado waxa isugu yimi wakiillo ka socday 11 qabiil oo ka tirsan qabiilada ay ka kooban tayahay Galmudug, si loogu heshiiyo dastuur Maamul goboleedku yeesho oo loo dejiyo baarlamaanka maamul goboleedka oo ka kooban 89 xubnood, kaas oo u doortay madaxwayne Cabdikariim Guuleed, oo ahaa shaqsi is-bahaysi dhow la lahaa madaxwayinihii hore ee Xasan Shiikh Maxamuud, halka madaxwayne ku xigeen loogu doortay Maxamed Xaashi.[9] July 2015, waxa la sameeyey dawlad goboleedka Galmudug, iyada oo xarun ku meelgaadh ah ay u sii noqotay Cadaado, maadaama oo caasimadda dastuuriga ah, Dhuusamareeb, ay ku jirtay gacanta Ahlu Sunna Wal Jamaaca, oo si wayn uga soo horjeeday heshiiska.[10]

Samaynta dawladda goboleedka cusub waxa markiiba ka soo horjeestay Puntland oo aaminsanayd in dastuurka lagu sameeyey Cadaado uu sheeganayo in guud ahaan gobolka Mudug uu qayb ka yahay Galmudug, oo ay ku jirto dhinaca woqooyi oo dastuurka Puntland uu sheegayo inay ka mid tahay Puntland, iyo inuu jebinayo heshiis sanadkii hore la galay oo lagu qaybiyay Mudug. Dhamaadkii 2015 dagaallo ayaa ka dhex qarxay labada dawlad goboleed: isaga oo socday mudo bil ah waxa ku dhintay 20 qof, waxa ku dhawaacmay 120, halka ay ku barokaceen dad ka badan 90, 000.[11]


### 1.1.2 Wejiga 2: 2016–18

Wejiga labaad ee geedi-socodku waxa uu sii xoojiyay dawlad goboleedka Galmudug. 'Doorashooyinka' Baarlamaanka Federaalka, oo ahaa kii u horeeyey tan iyo 1984, ayaa la qabtay 2016, balse sanad kadib madaxwayne Guuleed ayaa is-casilay, isaga oo xilka hayay laba sanadood keliya mudo xileedkiisii afarta sanadood ahaa, islamarkaana madaxwaynaha bedelay oo ah ahaa Axmed Ducaale (Xaaf),[12] ayaa ku guulaystay inuu isla sanadkaas la gaadho Puntland heshiis lagu kala qaybinayo Gaalkacayo islamarkaana rasmi looga dhigayo xadka u dhexeeya woqooyiga iyo koonfurta Mudug ee kala qaybiyo labada dawlad goboleed.

Is-bedelka madaxwaynenimo ee yimi waxa uu sidoo kale raad wayn ku yeeshay xidhiidhka uu lalahaa Ahlu Sunna Wal Jamaaca. Madaxwayne Guuleed oo ku dhowaa Madaxwaynaha Dawladda Federaalka ah, Xasan Shiikh Maxamuud, ma uu doonayn inuu aqballo dalabka Ahlu Sunna Wal Jamaaca ee ahaa in loo aqoonsado awood siyaasadeed iyo la aqoonsado guulaha ciidan ee ay ka gaadheen al Shabaab.[13, 14] Maadama oo aanu xidhiidh kaas la mid ah la lahayn dawladda federaalka ah, Madaxwayne Xaaf, waxa uu si dhaqso ah u qaaday dadaallo uu kula hadlayo Ahlu Sunna Wal Jamaaca. Iyada oo ay taageereen cidaha iskaashiga lala leeyahay ee caalamiga ah oo ay ka mid yihiin SSF, IGAD, iyo dalwadda Jibuuti, labada dhinac waxa ay Janaayo 2018 gaadheen Heshiiskii Jibuuti. Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa ay aqbashay inay ku biirto maamulka Madaxwaye Xaaf – iyada oo ku biirinaysa baarlamaankeeda ka Galmudug islamarkaana ku daraysa ciidamadeeda kuwa Galmudug iyo ciidanka qaranka.[15] Taas bedelkeeda, hogaamiyaha sare ee Ahlu Sunna Wal Jamaaca, Shiikh Maxamed Shaakir, ayaa loo dhiibay jagada cusub ee ah madaxa wasarada (*chief of minster*) islarmarkaana kooxdu waxa ay ku yeelatay baarlamaanka Galmudug 89 kursi.

Heshiiska Jibuuti waxa uu dhigayay in baarlamaanka Galmudug uu fadhiisto Cadaado, caasimadda ku-meel gaadhka ah, halka golaha wasiirada iyo saraakiisha xukuumaddu ay ka fadhiisanayaan Dhuusamareeb, caasimadda dawlad goboleedka. Madaxwayne Xaaf waxa uu ka soo guuray Cadaado oo waxa uu u soo guuray Dhuusamareeb, taas oo ka dhigtay Galmudug dawlad goboleedka labaad ee fadhigeedu yahay caasimadeeda rasmiga ah (waxa ay labaysay Puntland).[16] Haseyeeshee, tan iyo markaas Galmudug waxa ay noqotay maamul kala qaybsan, juquraafi ahaan iyo siyaasad ahaanba; garabyo siyaasadeed oo kala duwan ayaa la yeeshay is-bahaysiyo hay'ado kala duwan oo ka tirsan dawladda dhexe. Galmudug sidoo kale waxa soo maray sadex madaxwayne shan sanadood gudohood, islamarkaana mid kasta waxa uu la lahaa xidhiidh aan fiicnayn madaxwayne ku xigeenkiisa iyo afhayeenka baarlamaanka, kuwaas oo ah saraakiisha la doortay ee dawlad goboleedka kuwa kale ee ugu sareeya.

## Goobaha cilmi baarista laga sameeyey




Soohdimaha maamul ee degmooyinka Balamballe iyo Galhareeri laguma soo bandhigin khariiradan sababo la xiriira xog maqan ama aan la helin awgeed. Xuduudaha, iyo wixii macluumaad ah ee kale ee ka muuqda khariidadan micnaheedu maahan ogolaansho ama aqbalaad ku saabsan xuduudahaas.

**Isha xogta (xogtani waa la beddelay): Ururka Caalamiga ah ee Badbaadada NGO-yada (INSO)**

## Ahlu Sunna Wal Jamaaca (ASWJ)[17]

Ahlu Sunna Wal Jamaaca waa koox hubaysan oo ay sameyeen sanadkii 1991 Muslimiin Sunni ah oo Suufiya ah si ay uga hortagaan kooxaha jihaad doonka ah ee soo baxay jiritaanka al Shabaab ka hor. Iyaga oo inta badan ka hawlgelli jiray Mudug iyo gobolka Hiiraan ee ka tirsan HirShabeelle, Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa ay noqotay xoog muhiim ah u ah la dagaallama al Shabaab, islamarkaana waxa ay is-bahaysi aan xooganayn la lahaayeen dalwadihii ku-meel gaadhka ahaa. Sanadkii 2017, waxa la qiyaasay in dagaalamayaasheedu ay gaadhayeen ugu yaraan 5, 000. Waxa ay la galleen qaar ka mid ah dagaaladdi ugu adkaa ee lala galo al Shabaab islamarkaana waxa ay ku guulaysteen inay gacanta ku hayaan dhul laga xoreeyey al Shabaab. Taasi waxa ay keentay, in dhulka ay maamulaan Ahlu Sunna Wal Jamaaca ay noqdaan goobaha keliya ee Soomaalia, marka laga reebo Puntland iyo Somaliland, ee isku socodka wadooyinku oo aan xidhnayn ay suurtagal ka ahayd ilaa 200–300 kiilomitir oo socod ah.

Sanado badan, Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxay taageero dhow ka helaysay Itoobiya, iyada Muqdisho ay u arkaysay kooxda iyo dalka shisheeye ee taageeera inay ka beerayeen Soomaaliya is-diid faa'iido u ah Itoobiya. Guulaha ay goobaha dagaalka ka gaadheen kooxdu waxa ay si dhaqso ah isugu bedeleen hami siyaasadeed, oo waxa ay ka soo dhallan rogmeen koox hubaysan oo diimeed-qabiil oo waxa ay u xuub siibteen koox siyaasadeed oo miisaan leh. Haseyeeshee, eedo ah inay ku kaceen tacaddiyo xuquuqal insaan oo la huwiyay Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa ka mid ah inay toogteen dad shacab ah iyo dil aan garsoor jideyn.

# Qoraalo kooban

3 Bulshada Soomaalidu waxa ay u qaybsan tahay afar qabiil oo waawayn: Daarood, Hawiye, Dir iyo Digil-Mirifle. Mid kasta oo ka mid ah qabaa'ilkaas waxa uu u sii kala qaybsamaa qabiillo iyo jifooyin hoose oo daraasiin ah. Waxa intaas dheer, qayb dadwaynaha ka mid ah ayaa loo aqoosan yihiin inaanay ahayn qoomiyad ahaan Soomaali (sida Baantuuga, ama mid ka mid ah dadwaynaha kala duwan ee degan xeebta sida Banaadiriga iyo Baajuni); waxa lagu tilmaamaa inay yihiin isir ahaan kooxo 'laga tiro badan yaha.' Labada qabiil ee ugu awoodda wayn Soomaaliya waa Hawiye iyo Daarood. Eeg Menkhaus K (2018), 'Elite Bargains and Political Deals Project: Somalia Case Study', Stabilisation Unit, February.

4 Plaut M (2013), 'Ethiopia and Kenya help dismember Somalia', *New Statesman*, 3 September (https://www.newstatesman.com/africa/2013/09/ethiopia-and-kenya-help-dismember-somalia)

5 Cabral L (2011), 'Decentralization in Africa: Scope, Motivations and Impact on Service Delivery and Poverty', Overseas Development Institute, Working Paper 20, March.

6 Geedi-socodka nabadeed ee Mbagathi ee uu hogaaminayay urur goboleedka IGAD waxa lagu qabtay dalka deriska ah ee Kiiniya isaga oo socday Oktoobar 2002 ilaa December 2004. Waxa ka dhashay heshiis laga horyimi, dib looga wada hadlay, ama wax ka bedel lagu sameeyey dhawr jeer tan iyo 2004, balse waxa uu mudo ka badan toban sanadood ahaa nidaamka aasaasiga u ah heshiiska siyaasadeed ee Soomaaliya. Waxa uu dhallay heshiis ay ku taagnayd dawladda magac u yaalka ahayd ee loo yiqiin Dawladda Federaalka ah ee Ku-meelgaadhka ah oo jirtay 2004 ilaa 2012. Dawladdii dhallatay ku-meelgadhka kadib ee dhaxashay Dawladda Federaaka ah ee Ku-meelgaadhka ah ee la aasaasay 2012, oo ah Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxa ay inta badan ku tiirsanayd heshiiskii la galay 2004. Eeg Menkhaus K (2018), 'Elite Bargains and Political Deals Project: Somalia Case Study', Stabilisation Unit, February.

7 Inkasta oo dadwaynaha Soomaaliya badankiisu ku nool yahay goobaha miyiga ah, sida ay sheegtay xogta ay sanadkii 2014 soo saartay hay'adda Qaramada Midoobay ee magaceeda la yidhaahdo United Nations Population Fund (UNFPA), dadwaynaha Galmudug boqolkiiba 44 waxa ay degan yihiin magaallo, boqolkiiba 10 miyi, boqolkiiba 31 waa reer guuraa halka boqolkiiba 15 ay ka yihiin dad dalka gudihiisa ku barokacay (oo degan goobaha miyiga ah iyo magaallooyinka ba). Eeg, UNFPA (2014), 'Population Estimation Survey 2014 for the 18 pre-war regions of Somalia', October (https://somalia.unfpa.org/sites/default/files/pub-pdf/Population-Estimation-Survey-of-Somalia-PESS-2013-2014.pdf)

8 Eeg warbixinta, Somalia Stability Fund (2015), 'Facilitating the formation of the Interim Galmudug Administration', 31 August (http://stabilityfund.so/2015/08/31/facilitating-the-formation-of-the-interim-galmudug-administration/)

9 11 qabiil ee Galmudug degan ee wakiiladdu u joogeen waa Saleeban, Sacad, Cayr, Duduble, Mareexaan, Murursade, Dir, Surur, Abgaal (oo sidoo kale loo yaqaan Wacaysle), Sheekhaal iyo dhawr qabaa'il yaryar ah (Madhibaan, Tumaal iyo Xaskul), oo isku darkood la mid yahay hal qabiil.

10 Waxa jiray dagaal ka dhex dhacay Ahlu Sunna Wal Jamaaca, iyada oo xubnaha qaar ay taageereen Xasan Shiikh iyo geedi-socodka dhismaha dawlad goboleed. Waxa ay ku soo bireen wada hadalka oo waxa laga siiyay door golaha wasiirada ee Galmudug. Kuwii mucaaradka ku sii ahaa dawladda federaalka waxa wadar ahaan loo yiqiin 'Al-Sufa'.

11 Brady J (2016), 'Somalia: Violence in Galka'yo displaces 75,000 people', UNOCHA, 24 October (https://www.unocha.org/story/somalia-violence-gaalkacyo-displaces-75000-people)

12 Bulshada Soomaaliyeed dhexdeeda waxa ku badan in inta badan dadka loogu yeedho naanays. Naanaysta waxa caadiyan qofka u bixiya markii uu caruurta yahay saaxiibadood iyo qoyskooda, oo waxa laga soo dheegan karaa naanaysta dabeecad xooggan oo qofku leeyahay ama muuqaal jidheed.

13 Heritage Institute for Policy Studies (2019), 'The Galmudug Crisis: A Blueprint For Sustainable Settlement', Policy Brief 19, 4 September (http://www.heritageinstitute.org/the-galmudug-crisis-a-blueprint-for-sustainable-settlement/)

14 Thomas T (2015), 'Puntland, Galmudug, ASWJ, and the Somali Government Set to Face Off over Federalism Disputes', Somalia Newsroom, 10 July (https://somalianewsroom.com/2015/07/10/puntland-galmudug-aswj-and-the-somali-government-set-to-face-off-over-federalism-disputes/)

15 Thomas T (2018), 'Can Somalia Seal the Galmudug-ASWJ Peace Deal?', Somalia Newsroom, 20 January (https://somalianewsroom.com/2018/01/20/can-somalia-seal-the-galmudug-aswj-peace-deal/)

16 Heritage Institute for Policy Studies (2019), 'The Galmudug Crisis: A Blueprint For Sustainable Settlement', Policy Brief 19, 4 September (http://www.heritageinstitute.org/the-galmudug-crisis-a-blueprint-for-sustainable-settlement/)

17 Edited excerpt taken from: Felbab-Brown, V (2020), "The Problem with Militias in Somalia: Almost Everyone Wants Them Despite Their Dangers," in Day, A, Hybrid Conflict, Hybrid Peace: How Militias and Paramilitary Groups Shape Post-Conflict Transitions, New York: United Nations University.



Madaxweynaha Soomaaliya, Xasan Sheekh Maxamuud, iyo madaxweynaha cusub ee maamul goboleedka Galdmudug, Cabdikariim Xuseen Guuleed, oo lagu soo dhaweeyey garoonka diyaaradaha ee Adaado xiligii caleema saarka madaxweynaha ee Maamul goboleedka Galmudug markay ahayd 23 July 2015.

© UN Photo/Raymond Baguma

# 2

# Dhismaha dawlad goboleedka Galmudug: ka wada hadalka awoodda iyo hay'adaha siyaasadeed

**Dhismaha dawlad goboleedka Galmudug waxa astaan u ahayd, dhinac wada hadal iyo wada tashi ku dhisan isu tanaasul (dhex mara inta badan qabiilada) iyo in la qanciyo kuwa awoodda haya, iyo dhinaca kale tartan gudaha iyo debedda ah oo ku saabsan xuduudaha, awoodda iyo xilalka (*boundaries, powers and mandates*).**

## 2.1 Isutanaasulaka

Ka hor xilligii lagu heshiiyay dastuurka ku-meel gaadhka ah ee 2012, dhulka hada ah Galmudug waxa uu badankiisu ka koobnaa magaalooyin yar yar oo is-maamula (*mini-city-states*) oo ay gacanta ku hayaan qabiilo iyo kooxo kala duwan oo hubaysan. Tamarta ay keentay in la iska celliyo khatarta debedeed ayaa keentay wada-hadallo is-daba socda oo heer hoose iyo heer balaadhan labadaba ah oo dhex mara qabiilada, kas oo astaan culus u ah safarka loo maray sidii loo dhisi lahaa dawlad goboleedka Galmudug.

Maamulkii hore ee Galmudug ee 2006 waxa dhisay hogaamiyayaasha qabilka Sacad (oo ka tirsan beel waynta Habar Gidir).[18] Maamulkan Galmudug waxa uu ahaa mid aan awood balaadhan lahayn, iyada oo goobaha qaarkood ay gacanta ku hayeen maamulo beelo dhisteen oo ay ka mid yihiin maamulka Ximin iyo Xeeb – oo ay 2008 aasaaseen qabiilka Saleebaan – kaas oo xaruntiisu ahayd Cadaado, iyaga oo sidoo kale gacanta ku hayay qaybo ka mid ah Hobyo iyo Xarardheere[19]; maamul goboleedka ay ka dhiseen qabiilka Mareexaan ku 2011–12 goobo ka mid ah koonfurta galbeed Galmudug oo ah aagga Caabudwaaq, kaas oo ay ugu danbayntii la wareegeen Ahlu Sunna Wal Jamaaca oo saldhigoodu ahaa magaaladda Dhuusamareeb.

Geedi-socodka Cadaado ee 2015, si la mid ah isku dayadii ka horeeyey ee lagu doonayay in looga dhiso maamulo siyaasadeed gobolka, waxa xudun u ahayd gorgortan iyo isu tanaasulka. Inkasta oo uu la kulmay caqabado iyo is-fahmi waa – ku saabsan goobta shirka maamul dhisiddu ka dhacayo ilaa iyo halka uu noqonayo xadka maamulka cusub – waxa guud ahaan jiray aqbalaad ka timi qabiiladda waawayn. Waxa ahaa wax aan hore loo arag in dhamaan 11 qabiil ee ku nool koonfurta Mudug iyo gobolka Galguduud ay isu yimaadaan, iska daa inay dhisaan maamul xadkaas leeg oo ay ka heshiiyaan awood qaybsi.[20] Qabiiladda waawayn mid kasta door cad ayuu ku lahaa dhismaha dawlad goboleedka Galmudug.[21] Qabiilka Saleebaan oo gacanta ku hayay maamulka Ximin iyo Xeeb waxa uu madaxwaynaha Somalia Xasan Shiikh Maxamuud ka codsaday inay martigeliyaan geedi-socodka maamul dhisidda; Sacad – oo markii hore hogaaminayay maamulka Galmudug ee saldhigiisu ahaa Koonfurta Gaalkacayo – waxa la siiyay xaqa inay doortaan magaca maamulka iyo jagada madaxwaynenimo inay qaataan; Dhusamareeb, oo ay hoyga qabiilka Cayr ah iyo caasimadda gobolka Galguduud, waxa laga dhigay caasimadda rasmiga ah; af-hayeenka baarlamaanka waxa la siiyay qabiilka Murursade; ku xigeenka koowaad ee afhayeenka waxa la siiyay Dir; ku xigeenka labaad ee afhayeenka waxa la siiyay Saruur; halka qabiilka Mareexaan la siiyay jagada madaxwayne ku xigeenka.

Galmudug wax ay ku leeyihiin xildhibaanada Baarlamaanka (Aqalka Hoose) 36 xildhibaan, iyo sideed sanatar oo ka mid ah Aqalka Sare ee baarlamaanka qaran, iyada oo la isticmaalayo qaabka awood qaysiga 4.5 ka,[22] iyada oo sideed ka mid ah 11 qabiil ay kursi ku leeyihiin senetka (waa dhamaan qabiilada marka laga reebo Sheekhaal, Suruur iyo qabiilada 0.5 ka ah).[23] Heer dawlad goboleed, awood qaybsi qabiilada deegaanka ayaa lagu sargooyaa qoondaynta kuraasta. Galmudug waxa jira 11 qabiil oo qayb ka ah nidaamka awood qaybsiga: shan Habar Gidir ah (Sacad, Saleebaan, Saruur, Cayr iyo Duduble); Mareexan; Dir; Abgaal (oo ah lafta Wacaysle); Murursade (oo ka tirsan qabiil waynaha Hawiye); Shiikhaal; iyo dhawr qabiillo yaryar ah oo loogu yeedho Beesha Shanaad (waxa ka mid ah qabiiladda Madhibaan iyo Tumaal), oo isku darkooda u dhigma hal qabiil.[24, 25] doorashooyinka 2020 waxa ka horeeyey bilooyin xiisaddo taagnaayeen, balse ay socdeen madallo isku tanaasul lagu samaynayay: shirka dib u heshiisiinta Habar Gidir ee ka dhacay Hobyo ayaa ka horeeyey shir balaadhan oo beelo kala duwan ka soo qayb galeen oo ka dhacay caasimadda maamul ee Dhuusmareeb, kaas oo ay martigelisay dawladda Federaalka ah.

## 2.2 Wax u dhexeeya isu tanaasul iyo isku-qabsiga: ku biirinta kooxaha hubaysan ee aan dawliga ahayn (*incorporating a non-state armed group*)

Wejiga labaad ee dhisidda dawlad goboleedka Galmudug, kaas oo wada hadal laba geesood ah ka yeesheen Madaxwayne Xaaf iyo Ahlu Sunna Wal Jamaaca, waa uu ka duwanaa geedi-socodkii 2015 ee ku dhisnaa isku tanaasulka beelaha. Tani ma ahayn oo keliya markii u horaysay ee koox aan dawli ahayn oo hubaysan lagu daro nidaamka siyaasadeed ee Somalia, balse heshiisku waxa uu sidoo kale ka leexday talaabooyinka dastuuriga ah (sida habka 4.5) ee lagu salleeyo marka la qaybinayo jagooyinka siyaasadeed. Ka mid noqoshada Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa ka dhigtay wax kakan qaab-dhismeedka Galmudug ee awood qaybsiga iyada oo lagu daray baarlamaanka 89 xubnood oo ka socda Ahlu Sunna Wal Jamaaca kuwaas oo lagu soo xushay adeecista iyo ka go'naanshaha aragtida (*ideology*) Ahlu Sunna Wal Jamaaca ee aan lagu soo xulin qabiilka ay ka tirsan yihiin.[26] Qodobkani waxa uu ku soo biiriyay nidaamka siyaasadeed ee Somalia debecsanaan, iyada oo keentay in wax ka bedel iyo isku habayn lagu samayn karo si loo daboollo danaha ka baxsan kuwa qabiilka. Ahlu Sunna Wal Jamaaca waa ay diiday shirkii Cadaado sababta oo ah waxa ay doonaysay in loo aqoonsado inay kaga soo qaybgalaan koox 'siyaasi ahaan' ee aan loo kala jajebin qabiilada ay ka soo kala jeedaan, taas oo ay ka baqayeen inay hoos u dhigi karto saamayntooda siyaasadeed. Qaar badan ayaa ka horyimi waxa ay u arkayeen in ku darista Ahlu Sunna Wal Jamaaca [ee baarlamaanku] ay tahay mid aan xaq ahayn oo keenaysay in saami metelaad ay helaan qabiilada qaar ah (xubnaha Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa ka soo jeedaan qabiilada Cayr, Dir iyo Mareexaan). Tusaale ahaan, imaantinka Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa micneheedu noqday in Madaxwayne Xaaf iyo Shiikh Shaakir oo qabtay xilka xusub ee madaxa wasiirada, ay ka soo jeedaan isku hal qabii. Waxa ay sidoo kale ka turjumaysa (oo ay cirka ku sii shareertay) xiisadda ka dhex jirtay Galmudug iyo dalwadda federaalka ah. Xidhiidhka Madaxwayne Xaaf iyo Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa uu noqday

giraan is jiid jiid ah oo ka dhexeeya bartamaha iyo darafyada maadama oo dhinac waliba isku dayay inuu awood ku yeesho dhinaca kale.

Guud ahaan, awoodda Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa ay ku koobnayd meelo ka mid ah gobolka Galguduud; kooxdu wax kuraas ah lagama siin kuraasta labada aqal ee baarlamaanka dawladda dhexe. Inkasta oo ay sheegteen inay si cad iskaga ilaaliyaan qabyaaladda, saldhigga awoodeed ee Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa uu si aayar aayar ah ugu sii qasmayay siyaasadda qabiilada iyo khilaaf tan iyo shirkii Cadaado. Taageerayaashooda Mareexaan way kala qaybsameen intii lagu guda jiray wada hadaladii 2015 oo qaarkood ayaa go'aansaday inay qayb ka noqdaan geediga lagu dhisayo dawlad goboleedka. Qabiilka Dir ayay sidoo kale soo wajahday dagaal dhexdooda ah kadib markii Ahlu Sunna Wal Jamaaca ay ku biireen maamulka, halka taageeradii Cayr ee kooxda ay yaraysay xidhiidhka xididnimo ee uu beesha la leeyahay Madaxwayne Xaaf. Sanadkii 2019, Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa ay noqotay urur qoys maamulo.[27] Doorashadii 2020 waxa tirada ay baarlamaanka ku leeyihiin ku soo ururtay 20 xubnood iyada oo loo qaybiyay nidaam qabiileed – taas oo ah natiijo ka dhalatay saamayntooda siyaasadeed iyo ciidan oo hoos u sii dhacaysay.[28]

## Iskuqabsi i

Dhisidda iyo xoojinta Galmudug waxa ay sidoo kale leedahay dhinac khilaaf (*contention*) – ka dhexeeya kooxo iyo kooxo is diidan oo ku lug leh Muqdisho, maamulka Galmudug ee Dhuusamareeb iyo maamulka tartanka kula jiray ee saldhigiisu ahaa Cadaado, iyo sidoo kale Ahlu Sunna Wal Jamaaca. In la hello nidaam dawlad goboleed oo rasmi ah waxa ay sidoo kale bedeshay qaabkii wada hadalka iyo go'aan qaadashada – oo waxa ay noqotay mid ku tiirsan wada hadallo dhex mara dawlado (dawladda federaalka ah –dawlad goboleedka Galmudug iyo dawladda Galmudug–dawladaha kale xubinta ka ah federaalka) halkii ay ka ahaan jirtay wada wada hadallo iyo xidhiidh qabiilada ka dhex socda, islamarkaana waxa ay ka guurtay isku tanaasulka oo waxa ay u digo rogatay is-bahaysi samaysasho iyo kala qaybsanaan ka dhex jirta kooxo ka dhex jira dawladda goboleedka iyo dawladda federaalka ah.

Tan iyo markii la dhisay, Galmudug waxa ay u kala qaybsanayd Cadaado iyo Dhuusamareeb, iyada oo is-bahaysiyo la dhisayay, ay u wareegayeen, u kala jabayeen garabyada siyaasadeed ee Galmudug iyo Muqdisho. Inkasta oo uu taageero ka helay bartamaha (*centre*), madaxwaynihii u horeeyey ee Galmudug, Guuleed, awood uma yeelan inuu taageero gudaha ah helo. Taas bedelkeeda, Madaxwayne Xaaf, isaga oo is-bahaysi la yeeshay Ahlu Sunna Wal Jamaaca waxa uu awood u yeeshay inuu ilaaliyo jagadiisa iyo baarlamaanka gobolka ee fadhiyay Dhuusamareeb – inkasta oo aanay heshiis ahayn Muqdisho.[29] Iyada oo lagu eedeeyey inay farogellin ku hayso arimaha gudaha ee gobolada, dawladda federaalka ahi waxa ay qaab sii kordhaya u sii noqonaysay mid curyaansan oo waxa aanay awood u lahayn inay dhexdheexaadiso muranadaas daakhiliga ah.

Qaybtii danbe ee 2019 iyo bilawgii 2020 waxa sii xoogaystay khilaaf ka dhex qarxay dawladda federaalka ah iyo Madaxwayne Xaaf, khilaafkaas oo ku saabsanaa doorashooyinka qaabka loo qabanayo. Ahlu Sunna Wal Jamaca – oo ay daciifisay khilaaf dhexdooda ah iyo iyaga oo siyaasad ahaan dhinac loo riixay kadib markii ay is-khilaafeen Madaxwayne Xaaf inyar kadib markii la dhisay maamulka Ahlu Sunna Wal Jamaaca – ayaa iyana khilaafka soo dhexgashay. Xiisaddu waxa ay kor ugu kacday heer rabsasho dhacaan, iyada oo ciidamado dawladda federaalka ah la keenay si ay u gacanta ugu dhigaan caasimadda gobolka – iyada oo la sheegay in la doonayay inay 'ilaaliyaan amaanka' doorashooyinka. Doorashadii dhacday oo ay qaadaceen siyaasiyiinta mucaraadku, waxa lagu doortay madaxwayne cusub – Axmed Cabdi Kaariye (Qoor-Qoor), oo uu taageeray Farmaajo. Qoor-Qoor waxa uu markiiba kala kulmay caqabad Xaaf iyo Ahlu Sunna Wal Jamaaca, balse inkasta oo uu markii hore diiday natiijada, markii danbe waxa uu ku soo noqday Dhuusamareeb si uu u aqoonsado maamulka Qoor-Qoor, oo si xirfadaysan ugu guulaystay bishii u horaysaba inuu la heshiiyo mucaaradka oo ka helo aqoonsi Xaaf.[30] Iyada oo Ahlu Sunna Wal Jamaaca ay markii hore diideen inay la hadlaan, ugu danbayntii dib ayay u gurteen markii isku dhac dhexmaray Ciidanka Qaranka Soomaaliya si wayn loogu daciifiyay.[31]

Dawlad-dhisiddu kuma dhamaato dhismaha baarlamaan gobol. Balse waa geedi-socod wada hadal oo joogto ah, iyo tijaabinta xidhiidhada ka dhex jira kooxaha kala duwan ee awoodda leh ee ka jira Galmudug, iyo hogaamiyayaasha siyaadadeed ee heer gobol iyo kuwa dawladda federaalka ah.

## 2.3 Taageerada debedeed ee dhismaha dawlad goboleedka

Taageerada caalamiga ahi qayb muhiim ah ayay ka ahayd geedi-socodka dhisidda dawlad goboleedka Galmudug – iyada oo la odhan karo way kaga badnayd dawlad goboleedyada kale. Tani waxa ku jiray taageerada caadiga ah ee la siiyo horumarinta hay'adaha iyo awood dhisidda – inkasta oo ay ahayd uun heer gobol (*subnational*) ee aanay hayn heer qaran – sida tabobaridda iyo khayraad siinta saraakiisha amaan, taageerista hababka maaraynta maaliyadda dawladda iyo horumarinta shaqaalaha dawladda, iyo marshuucyada maalgellinta kaabayaasha dhaqaale.

Taagerada caynkaas ahi muhiim ayay tahay marka aan loo arag dawladda federaalka ah dhex-dhexaadiya dhex ah oo aan dhinac raacsanayn. Dadka la waraystay waxa ay sheegeen in kooxda siyaasadda gacanta ku haysa (*political elite*) aanay lahayn qaan gaadhnimo siyaasadeed, oo waa kuwo soo dhoweya "taageero iyo tilmaamo ay ka helaan cidaha ay iskaashiga leeyihiin ee caalamiga ah" balse aanay ka war hayn doorkooda iyo raadayntooda gaarka ah.[32] Iyada oo SSF gaar ahaan lagu amaanay inay bixisay taageero waqtigeedii timi, debecsan islamarkaana siyaasad ahaan wax fahamsan,[33] waxa muhiim ah in la is waydiiyo su'aalaha balaadhan ee ku saabsan ku xisaabtanka xaasaasiyadda khilaafka, marka la eego isku dheellitirka nugul ee isu tanaasulka iyo Isku-qabsiga. In si xilli hore loo aqoonsado islamarkaana wax laga qabto saamaynta taban ee farogelintu – duruufta ah in marka wax laga bedello meeqamka siyaasadeed sida uu markaas yahay ay keento inta badan khilaaf kale – waxa ay caawin kartaa in la hello talaabooyin balaadhan oo lagu dhiso kalsoonida ka dhaxaysa deeganada kala duwan. Tusaale ahaan, waxa lagu doodi karaa in muhiimadda shirkii Cadaado ee isku keenay 11 qabiil ay majo-xaabisay wada hadalka Jibuuti oo ku gaar noqday Xaaf iyo Ahlu Sunna Wal Jamaaca, islamarkaana kala qaybsanaantii danbe ee Cadaado iyo Dhuusamareeb waa la sii odorosi karayay. In awoodda la isugu geeyo dadaalo jawaab celin ah (*reactive*) oo aan joogtaysnayn oo muhiimadoodu tahay inay xaqiijiyaan oo ay ilaaliyaan balan qaadka inta yar ee siyaasadda gacanta ku haysa (*elite*) waxa ay gacan ka gaysan kartaa kobcinta marshuuca federaalka, balse waxa ay keeni kartaa khatar ah in indhaha laga laliyo waxyaabaha daruuriga u ah in lagu guulaysto nabad waarta.

Guud ahaan, taageerada caalamiga ah ee Galmudug iyo dalka la siiyay waxa leexiyay muhiimadda dheeraadka ah ee la siiyay ajendaha amaan oo mudnaanta siiya hawlgalada la dagaalanka argagixisada ee ka dhanka ah al Shabaab. Ka qabsashada iyo gacan ku haynta dhul ay maamusho al Shabaab ayaa ah doorka ugu muhiimsan ee ciidamada dawladaha xubinta ka ah federaalka, oo ay ku jirto Galmudug, islamarkaana xaqiijinta awoodda ciidamada amaanka ee dawlad goboleedka ayaa mudnaanta muhiimka ah u ahayd taageerada maaliyadeed iyo saad (*financial and logistical support*). Waxa muhiim ah in si dhaqso ah loo sameeyo qiimayn buuxda oo ku saabsan sida hawlaha amaan ay u waafaqsan yihiin geedi-socodka federaalaynta, gaar ahaan heerka dawladaha xubinta ka ah federaalka.

# Qoraalo kooban

18 Jifo iyo qabiil labada ba waxa mararka qaar loo isticmaali karaa si isku mid ah – inkasta oo Soomaaliya ay ka jiraan afar qabaa'il oo waawayn, jifooyinka ayaa lagu tilmaami karaa qabiil mararka qaar hadii ay degan yihiin dhul balaadhan ama marka la soo koobayo.

19 Maamulkii Ximan iyo Xeeb waxa uu burburay sanadkii 2015 iyada oo Al-Shabaab ay qabsatay Xarardheere.

20 Tixraaca hore (ibid).

21 Heritage Institute for Policy Studies (2019), The Galmudug Crisis: A Blueprint For Sustainable Settlement, Policy Brief 19.

22 Qaabka awood qaybsi ee 4.5 waxa uu ku dhisan yahay afarta qabaa'il ee ugu wayn Soomaaliya – Darood, Hawiye, Dir iyo Digil-Mirifle – iyo 0.5 oo ka kooban dhamaan qabaa'ilka laga tiro badan yahay), kuwaas oo cidda ku metelaysa baarlamaanka iyagu soo xusha.

23 0.5 waa qabaai'lka laga tiro badan yahay ee ka midka ah nidaamka awood qaybsi ee 4.5. Puntland waxa loo qoondeeyey 11 senetar, halka dawlad goboleedyada kale (Galmudug, HirShabeelle, Koonfur-Galbeed iyo Jubaland) uu mid waliba ka leeyahay sideed kursi.

24 Qaabka ah 11 ka qabaa'il waa mid si wayn loogu muransan yahay dawlad goboleedka dhexdiisa oo waxa jira qabaa'il ka soo horjeedda. Qabaa'ilkaasi waxa ay aaminsan yihiin in nidaamkanu u daneeyo tiro qabaa'il xoog badan – eeg Sheikh, A.K; Galvanek, JB & Grimm, P, (2019) 'Conflict Assessment, Galmudug State An Analysis of Local Perspectives', Berghof Foundation.

25 Wejigii hore ee geedi-socodka dhismaha dawlad goboleedka waxa lagu heshiiyay in wadarta guud ee baarlamaanku ay noqoto 89. Wejigii labaad waxa hoos loogu dhigay 69.

26 Kooxda waxa markii hore la siiyay 89 kursi, taas oo qaar ka mid ah taageerayaashoodu ay dood ka keeneen ilaa ugu danbayntii loo qoondeeyey 106 kursi.

27 Waraysi lala yeeshay qof la-talliye u ah deeq bixiye caalami ah, March 2020

28 Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxa ay gaysay Ciidamada Qaranka Soomaaliya magaalada Dhuusamareeb bishii Febraayo ee 2020, taas oo inay noqotay cidda ugu xoogga badan gobolka, islamarkaana daciifisay Ahlu Sunna Wal Jamaaca.

29 Tixraaca hore (Ibid).

30 Shabelle Media Network (2020), '*Somalia: The Remaining Galmudug MPs to Be Announced Amid Dispute*', 5 Jan (https://allafrica.com/stories/202001060281.html)

31 https://www.garoweonline.com/en/news/somalia/so-what-next-after-fgs-victory-over-aswj-militia-in-galmudug

32 Waraysi ay Saferworld la yeelatay sarkaal dawladda hoose ah, Cadaado, April 2019.

33 Eeg: Laws, E (2018) 'Thinking and working politically in Somalia: A case study on the Somalia Stability Fund', Overseas Development Institute, May.



Xubna ka tirsan Golaha Galmudug ayaa ka qeybgalay aqoon isweydaarsiga ee lagu qabtay Muqdisho bishii Nofeembar 2015. The aqoon isweydaarsiga waxaa taageeray Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM).
© AMISOM/Ilyaas Axmed

# 3

# Ballaadhinta ka qaybgalka siyaasadeed

**Halka golaha ka kooban 25 hogaamiye-dhaqameed (Guurtida) ay ka xushaan wakiiladda baarlamaanka Galmudug, oday dhaqameedyo iyo guddi qabiil oo ka kooban 51 xubnood ayaa doorta xildhibaanada ka midka noqonaya baarlamaanka qaran [baarlamaanka federaalka ah].[34] madaxwaynaha iyo madaxwayne-ku-xigeenka waxa doorta xubnaha baarlamaanka. Heer degmo ahaan waxa doorta maayarka golaha deegaanka oo ay soo xuleen Guurtidu. Dumarka looma ogola inay noqdaan hogaamiye dhaqameed, sidaasdarteed kama noqon karaan qayb hanaanka lagu doorto jagooyinka heer qaran.[35] Qabiiladda laga tiro badan yahay sida Baantuuga, Banaadiriga, Gabooye iyo Madhibaan caadiyan waa laga reebaa heeraka kala duwan ee maamul ee nidaamka qabiileed ee Soomaalida, haseyeeshee qayb ayay ka ahaayeen dhismaha dawlad goboleedka Galmudug, oday dhaqameed ka tirsan beelaha laga tiro badan yahay ayaa xubin ka ah Guurtida Galmudug ee ka kooban 25 xubnood.[36, 37]**

## 3.1 Qodobbada saameeya xulashada

Guud ahaan, waxa ay u muuqataa in shan shardi ay go'aamiyaan ka mid noqoshada baarlamaanka: hantida, saamaynta, waxbarashada, danaha qabiilada iyo 'xaqnimada (*fairness*)' – sida in la xaqiijiyo in qabiiladu metelaad isku dhiganta ay leeyihiin – iyada oo "waxbarashada iyo hantida maaliyadeed ay yihiin kuwa ugu aasasisan ee go'aamiya in qayb laga noqdo siyaasadda Soomaaliya guud ahaan."[38] Ololaha oo u baahan in hogaamiye dhaqameedka la xodxoto ayaa ah mid qarash badan ku kaco, sidaas darteed, waxa uu u dan yahay murashaxiinta hantida badan leh iyo xubnaha ka soo jeeda qoysaska caanka ah. Shuruudaha kale ee qaybta ka qaata 'u qalmidda' murashaxiinta waxa ka mid ah "awoodda ay u leeyihiin inay bixiyaan adeegyo" iyo "inay ka shaqeeyaan danaha dadwaynaha"; tusaale ahaan, ashqaasta xidhiidhka la leh dawladda ama taliska jira ee "awood u leh inay hore u riixaan danaha guud ee qabiilka."[39] Awoodda ay u leeyihiin inay ugu hanjabaan dadka la tartamaya gacan ka hadal ayaa iyana muhiim ahayd.

Wakiiladda siyaasadeed badankoodu waa niman waawayn oo laga soo xulay qabiiladda waawayn. Fursadaha dhallinyarada, dumarka iyo dadka laga tiro badan yahay waxa ay ku xidhan tahay doorka iyo jagooyinka ay ku leeyihiin qaab dhismeedka dhaqan dhexdiisa. Baahida loo qabo hanti iyo 'waayo aragnimo," sida inay awood u yeeshaan inay bedelaan aragtida oday dhaqameedka ayaa caqabad ku noqon karta dhallinyarada iyo dumarka gaar ahaan. Suurtagalnimada in la doorto Haween iyo xubno ka socda dadka laga tiro badan yahay way hoosaysaa, balse kor ayay u socotaa. Guud ahaan, dadka ka qaybgalay cilmi-baadhistu waxa ay sheegeen in in haweenka, qabiiladda laga tiro badan yahay iyo dhallinyaradu ay ku leeyihiin metelaad fiican maamulka degmooyinka [marka la barbar dhigo meelaha kale] – jagooyinka awoodeed ee ay leeyihiin markaas way ka awood yar yihiin – marka loo eego heerka gobol.

## 3.2 Fursadaha ka qaybgalka siyaasadeed: dhallinyarada

Waa lagu kala aragti duwan yahay inta ay gaadhsiisan tahay metelaadda siyaasadeed ee ay dadka da'da yari ku heleen nidaamka federaalka ah. Halka dadka la waraystay qaarkood ay sheegeen inaanay metelaad badan haysan, gaar ahaan xagga xildhibaanadda baarlamaanka, qaar kale ayaa sheegay in dhallinyaradu ay ku leeyihiin "boqolkiiba 30 kuraasta baarlamaanka heer qaran iyo ka heer dawlad goboleed".[40] Dadka la waraystay ee ka socday ururrada dhallinyarada ayaa xitaa tilmaamay boqolkiiba 70 ka qaybgal dhallinyaro ah (oo ah inta badan ragga iyo wiilasha) ee heer dawlad goboleed. Markii su'aalo la sii waydiiyay waxa caadaatay in tiradan ay tahay mid la barbar dhigay inta ay ka haysteen dawladihii hore oo jagooyinka intooda badan ay ku fadhiyeen oday dhaqameedyo ama dad waawayn (ka wayn 45).[41]

## 3.3 Fursadaha ka qaybgalka siyaasadeed: Haweenka

Heer qaran ahaan, qoondada haweenka oo ah boqolkiiba 30 in loo gaar yeello in haweenku ku yeeshaan ka qaybgalka siyaasadeed ayaa lagu heshiiyay geedi-socodkii doorasho ee 2016/2017 si ay ugu yeeshaan baarlamaanka federaalka ah ee cusub, kaas oo dhowaan lagu daray Xeerka Doorashooyinka Federaalka ee 2020[42] haseyeeshee, welli waxa walaaca ka taagan yahay qaabka loo fulinayo islamarkaana waa arrin taagan oo ay ku hawllan yihiin haweenka Soomaaliyeed ee u dhaqdhaqaaqa xuquuqda Haweenka iyada lagu jiro u diyaar garowga doorashooyinka.[43] Tirada dhabta ah ee haweenka ku jira baarlamaanka 2016/2017 waa 66 xubnood oo ka dhigan boqolkiiba 24. Haseyeeshee, marka la eego 15 sanadood ee u danbeyeey, ka qaybgalka tooska ah ee siyaasadeed ee haweenku si aayar ah ayay kor ugu socotay. Sanadkii 2012 haweenku boqolkiiba 14 keliya ayay ku lahaayeen kuraasta baarlamaanka – taas oo horumar ahayd marka la barbadhigo 2000 dii markaas oo haweenku ay haysteen qiyaastii boqolkii ba 8 kursi.[44] In la fahmo sida nidaamka federaalku u awood ugu siiyo kooxo gaar ah inay sii xoojistaan jagooyinkooda siyaasasadeed iyo bulsho ee Galmudug iyo guud ahaan Soomaaliya, waxa ay inaga caawinaysaa inaynu aqoonsanno oo tilmaanno meelaha nidaamku ka debecsan yahay ee wax laga bedelli karo (*flexibility*), iyo sidoo kale in la qiimeeyo suurtagalnimada in dhamaan dadka Soomaaliyeed ay gaadhaan nabad waarta iyo amaan.

Heer qaran ahaan, laba ka mid ah sideedda senetar ee Galmudug metela ayaa haween ah, halka sagaal ka mid ah 36 xildhibaan ee ka tirsan Golaha Shacabk ay haween yihiin. Bartilmaameedku waxa uu ahaa doorashadii 2016 in boqolkiiba 20 ay haween noqdaan baarlamaanka dawlad goboleedka Galmudug, halka laga gaadhay boqolkiiba 17, (8 kursi), taas oo sii yaraatay markii ay baarlamaanka ku soo biireen Ahlu Sunna Wal Jamaaca.[45] Taas macneheedu waxa weeye in baarlamaankii Galmudug ee 2017–2020 ay haweenku ka ahaayeen qiyaastii 4.5 boqokiiba baarlamaankii ay Ahlu Sunna Wal Jamaaca qaybta ka ahaayeen – halka doorashooyinkii u danbeeyey loo qoondeeyey haweenka lix kursi keliya. Haseyeeshee, haweenay ayaa loo doortay inay noqoto ku-xigeenka

afhayeenka baarlamaanka markii u horaysay baarlamaanka Galmudug ee doorashadii 2020 – tan oo ah markii u horaysay ee nooceedu ka dhaco siyaasadda Soomaalida.[46]

Haweenku door gaar ah ayay ku leeyihiin qabiilka dhexdiisa, kaas oo aanay ka mid ahayn inay qayb ka noqdaan hogaanka ama go'aan qaadashada arimaha qabiilka ama arimaha guud. Sidaas darteed, inkasta oo haweenku ay mudo dheer qayb ka ahaayeen wada hadalka qabiiladda ee nabadda, iyaga oo oday dhaqameedka kala shaqeeyey arimaha nabadda la xidhiidha, oo ay diyaarinayeen goobaha shirarku ka dhacaan islamarkaana ay daaha dabadiisa ka dhex dhexaadinayeen qabiiladda kala duwan markii lagu jiray geedi-socodka dawlad dhisidda ee 2014–2016, ragga oo keliya ayaa qayb ka ahaa mararka la qaadanayo go'aanada: haweenku si toos ah uma fadhiistaan miiska marka hogaamiya dhaqameedka (oo rag ah) ka kala socda qabiilada kala duwan ay wada hadalka ku jiraan.[47] Markii nidaamka awood qaybsi ee 4.5 laga dhigay mid rasmi ah wax sii xoogaystay oo sii qoto dheerastay nidaamkaas haweenka debedda u riixaya. Tusaale ahaan, haweenka waxa loo arkaa 'in aan lagu kal-soonaan karin' inay noqdaan wakiil siyaasaeed oo xafiis qabta maadaama oo ay xidhiidh la leeyihiin qabiilka aabeheed iyo ka xaaskeeda islamarkaana daacadnimadeedu ay noqon karto mid kala qaybsanta.[48]

Waxa jira dood ku saabsan saamaynta ay mabaadida diinta Islaamku ku leeyihiin ka qaybgalka siyaasadeed ee haweenka. Arinkani waxa uu ka dhex dhaliyay dalka dood – halka dadka qaar ay u arkaan inaan labadu isla jaan qaadi karin, kuwa kale ayaa u arka inaanay jirin meel Islaamku ku mamnuucay in haweenku ay ka qayb noqdaan arimaha siyaasadeed iyo dan guud, islamarkaana dadka qaar ayaa kala saara caqabadaha diimeed iyo kuwa dhaqan, oo waxa ay ku doodaan in dhaqanku yahay caqabadda. Sanadkii 2016 Golaha Culimada Soomaaliyeed waxa ay taageereen qoonada boqolkiiba 30 ka ah ee haweenku inay ku yeeshaan baarlamaanka, iyaga oo sheegay in Islaamku aanu ka soo horjeedin in haweenku ka qayb noqdo siyaasadda.[49] Inkasta oo qoonadada boqolkiiba 30 ah ay ka soo horjeesteen qaar ka mid ah oday dhaqameedka, kooxo diimeed, iyo rag siyaasiyiin ah oo ku sheegay inay tahay wax bulshada caalamku ku soo rogtay, waxa jira dood firfircoon oo socota iyo u dhaq-dhaqaaqis ay wadaan haweenka Soomaaliyeed iyo u dhaq-dhaqaaqayaasha Soomaaliyeed ee arimaha madaniga ah oo garab taagan arinkan oo inta badan indhaha laga lalliyo.

**Sanduuqa 2: Qayb ka mid ah waraysi lala yeeshay haweenay xildhibaan ah oo ka tirsan baarlamaanka qaran oo laga soo doortay Galmudug**

Guud ahaan, caadi kama aha bulshada Soomaalida dhexdeeda inay haween u doortaan inay wakil uga noqoto qabiilka fagaarayaasha heer deegaan iyo kuwa heer qaran. Sidaas oo ay tahay, waxa hadana jira isbedel xagga fekerka ah oo ka dhex socda bulshada Soomaalida dhexdeeda kaas oo ku saabsan haweenka. Marar badan, fursadaha ay haweenku u leeyihiin inay helaan kursi baarlamaan ama jago waxa ay la mid tahay ta ragga – iyada oo ay shardi u tahay inay leeyihiin awood la mid ah iyo istiraajiyad olole oo waxtar sare leh. Haweenka ka soo jeeda qabiilada caanka ah ayaa fursad fiican u leh in loo doorto baarlamaanka ama maamulka degmada. Haweenka doonaya inay xubin ka noqdaan baarlamaanka waa inay muujiyaan astaamo gaar ah sida inay tahay hooyo wanaagsan, inay u nugushahay oo ka war hayso baahiyaha dadka kale, waxbarasho fiican inay leedahay, inay ixtiraamto diinta iyo dhaqanka, iyo ta ugu muhiimsan oo ah inay leedahay hanti.

## 3.4 Fursadaha ka qaybgalka siyaasadeed: qabiilada laga tiro badan yahay

Nidaamka wax lagu qaybsado ee 4.5 waxa uu xaqiijiyaa in qabiiladda waawayn ay helaan mataalad is leeg, balse ma damaanad qaado in dhamaan qabiilada iyo jifooyinka hoose ee qabiilku ka kooban yahay ay ku qanacsan yihiin kuraasta ay ku leeyihiin baarlamaanka.[50] Qeexidda beelaha laga tiro badan yahay waxa ay siyaasad ahaan noqotay mid aad muhiim u ah kadib markii dalku burburay 1992, iyo markii la soo rogay Dastuurka Ku-meel gaadhka ah iyo nidaamka federaalka ah. Inkasta oo xeerarka qabiilada iyo mag wada bixintu ay hore u sii jireen, mabda' 4.5 waxa uu keenay in qabiiladda

laga tiro badan yahay siyaasad ahaan loo aqoonsado inay yihiin daneeyayaal-siyaasadeed (*Political stakeholders*) oo kuwa kale la siman. Dhinac marka laga eego, geedi socodka dawlad-dhisiddu waxa uu u noqday "fursad dahabi ah" qabiiladda laga tiro badan yahay. "Waxa ay noqotay markii u horaysay taariikhda ee qabiilada laga tiro badan yahay loo siiyay fursad inay soo magacawdaan cidda iyaga metesha."[51] Dhinaca kale, waxa ay kor u qaaday waxa laga dheefi karo hadii ciddi sheegato in laga tiro badan yahay, gaar ahaan mararka jifooyin dad badan leh oo degan goob cayiman ay isku tilmaamaan inay yihiin kuwo 'laga badan yahay' – oo ay qayb ka noqdaan 0.5 ka midka ah 4.5 – islamarkaana ay doonaan in la siiyo kursi siyaasadeed. Sidaas darteed, 'qabiil laga tiro badan yahay' waxa lagu tilmaami kara kooxo ka mid ah qoondada rasmiga ah ee 0.5 ama kooxo isku tilmamaay inay sidaas yihiin sababta oo ah qiyaasta xagga tirada, iyo arimo la xidhiidha qabiil ahaan ama jifo ahaan.

Dadka la waraystay qaar ka mid ah waxa ay sheegeen inay tahay arin liita (*naïve*) in laga hadlo madaxbanaani siyaasadeed oo ay yeeshaan qabiiladda yaryar, maadama oo danaha qabiilada waawayn ama xitaa siyaasiyiinta Muqdisho saldhigoodu yahay ay saamayn ka wayn ku yeelan karaan cidda ay siyaasada ahaan u dirtaan metelaad. Dareenkan waxa muujiyay dad jooga Cadaado iyo gaar ahaan Dhuusamareeb. Qaar badan oo ka mid ah dadka la waraystay oo ka tirsan qabiilada loo aqoonsan yahay in laga tiro badan yahay waxa ay sheegeen baahida loo qabo qabiiil wayn oo 'damaanad haye' noqda, taas oo ka turjumaysa habka mag-wadaagta ah ee ka dhexeeya qabiilada yaryar iyo kuwa waawayn. Tusaale ahaan, dad la waraystay oo jooga Caabudwaaq waxa ay sheegeen in xildhbaan haweenay ah ay doorteen xubno ka tirsan qabiilkooda, balse jagada "waxa markii hore qabiilkooda siiyay jagada qabiilka Sacad oo damaanad haye u ahaa."[52] Dad la waraystay oo Cadaado joogay ayaa si cad u yidhi" "Ma nihin dad madaxbanaan, sidasdarteed si fudud oo toos ah ama dadban ayaa naloo saamayn karaa (*manipulate*)."[53]

Waxa tusaalayaasha sare ka cad in awoodda ay u leeyihiin qabiiladda yaryar inay doortaan murashaxooda siyaasadeed ay caqabad ku keenni karaan qabiiladda waawayn, iyada oo la dhigi karo shuruudo cad cad oo go'aamiya qabiiladda yaryar ee yeelan kara metelaad siyaasadeed. Arrintani way isbedelli kartaa: tusaale ahaan, xildhibaan baarlamaan oo Cadaado jooga ayaa faahfaahiyay hab loogu yeedho "awal nasab, aakhir nasab": kadib markii uu dhinac u riixay qabiil wayn oo ku eedeyey inay jebiyeen caadada qabiilka, qabiilkii laga tiro badnaa dib ayaa loo aqbalay mudo kadib sababta oo ah tiradooda iyo waxa ay ku darsadeen mar dagaal qabiil qarxay. Taasi waxa ay dhashay in la waraystahan loo doortay duqa magaalda kadibna xubin baarlamaan oo metesha Cadaado.

## 3.5 Dadka dalka gudihiisa ku barokacay

Dadka dalka gudihiisa ku baro-kacay inay si firfircoon uga qayb noqdaan arimaha bulsho iyo siyaasadeed waa arin adag oo u baahan in lagu sameeyo lafo-guris dheeraad ah. Marka baro-kacu ka dhaco Galmudug dhexdiisa, waxa dadka la waraystay tilmaameen sida "dad ku noolaa goob tobonaan sanadood ay u noqdeen dad laga tiro badan yahay, oo qabiillo cusub oo halkaas u soo guuray ay u noqdeen kuwa ugu badan".[54] Arrinkani waxa uu saamayn ku yeeshay cidda awood u leh inay sheegato metelaad siyaasaadeed: mid ka mid ah dadkii la waraystay ayaa yidhi "markii lagu dhex jiray doorashooyinka baarlamaanka Galmudug, waxa naloo sheegay in qaybtayadii la siiyay haweenay ka soo jeedaa qabiiladda laga tiro badan yahay oo aan ka soo jeedin dalwad goboleedka Galmudug." Murashaxa ka soo jeedaa meel ka baxsan Galmudug ayaa mudnaan ka yeelan kara qof ku baro-kacay dawlad goboleedka dhexdiisa, hadii ay ka soo jeedaan qabiillo hore ugu noolaa deegaanka.[55]

Inta ay leeg tahay muddada dadka dalka gudihisa ku baro-kacay ay ku noolaayeen goob ayaa iyana u muuqata inaan tixgellin la siin: "waxa maqan waa aqbalaadda in dadka 'meel kale' ka yimi ay leeyihiin xuquuq siyaasadeed kadib marka ay goob ku noolaadaan mudo toban ilaa 15 sanadood ah, tusuaale ahaan."[56] Caruurta ay dhaleen dadka soo degay goobta ma sheegan karaan oo kuma doodi karaan xuquuqo siyaasadeed hadii qabiilka ay ka tirsan yihiin aanu ka mid ahayn qabiiladda loo yaqaan inay degan yihiin goobtaas. Sidoo kale awoodda ay u leeyihiin inay u doodaan metelaad siyaasaded way hoosaysaa oo waxa go'aamiya oday dhaqameedka, oo waxa ay leeyihiin culays aad u yar oo siyaasadeed, bulsho, dhaqaale iyo – ta ugu muhiimsan oo ah – qabiil si ay u saameeyaan oday dhaqameedka ama maamulka. Dadka la waraystay ee ka tirsan dadka dalka gudihisa ku baro-kacay waxa shegeen inay rajo ka qabaan in maamulka cusub ee la dhisay uu kobcin karo doorkooda siyaasadeed, oo waxa ay muujiyeen sida ay uga niyad jab san yihiin xaaladdu sida ay hada tahay. Koox degan Dhuusamareeb ayaa ka codsaday maamulka degmada in dadka dalka gudihisa ku baro-kacay la siiyo dhul ay si rasmi ah u degaan,

balse kuma ay guulaysan. "shalay iyo maallintii ka horaysa ba wax aan u tegay maamulka degmada iyo saraakiil kale si aan uga codsado inay dadka dalka gudihisa ku baro-kacay u siiyaan dhul ay si rasmi ah u degaan. Balse namay siin tixgellin badan oo dadaalkayagii ma uuu guulaysan."[57] Mudnaanta koowaad ee dadka dalka gudihisa ku baro-kacay waa inay dib ugu noqdaan guryahoodii oo ay dawladda Soomaaliya ay nabad ka dhigto goobahaas si ay dib ugu noqon karaan.

## Qoraalo kooban

34 Xasan Shiikh oo ahaa Madaxwaynihii Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya waxa uu bilaabay nidaam cusub oo ah in gudi ka kooban 51 qof ay xulaan wakiiladda siyaasadeed. Gudiyadu waxa ay inta badan ka koobnaayeen hogaamiyayaasha qabaa'ilada, balse waxa sidoo kale ku jiray tiro hogaamiyayaal bulsho ah sida culimada diinta, haween iyo ganacsato.

35 McCullough A and Saed M (2017), Gatekeepers, elders and accountability in Somalia, ODI, December.

36 Tixraca hore (Ibid). Haseyeeshee, tan iyo markii dalwaddu burburtay sanadkii 1991, qaar ka mid ah xubnaha qabaa'ilka laga tiro badan yahay oo han leh ayaa bilaabay inay isku caleemo saaraan hogaamiyayaal qabiil. Tani waxa ay keentay inay bataan tirada oday dhaqameedka iyo hogaamiyayaasha qabaa'ilka, islamarkaana waxa ay keentay xiisad ka dhex dhacda kuwa ay doorteen xubnaha qabaa'ilka tirada badan iyo kuwa is caleemo saaray. Sidoo kale eeg: Bradbury, M. and Catholic Institute for International Relations (2008) Becoming Somaliland. London: Progressio.

37 Saferworld interview with woman national MP for Galmudug, February 2020.

38 Tixraaca hore (Ibid).

39 Koox odayo ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Cadaado, April 2019.

40 Koox dhallinyaro ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Caabudwaaq, April 2019.

41 Koox dhallinyaro ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Cadaado, April 2019.

42 Mahmood O (2018), 'Women claim their place in Somalia's politics', *ISS Today*, Institute for Security Studies, 14 September (https://issafrica.org/iss-today/women-claim-their-place-in-somalias-politics)

43 Bishii Maarso ee 2019, haween Soomaaliyeed oo hogaamiyayaal ah ayaa ugu baaqay sharcidejiyayaasha inay ansixiyaan marshuuca dib u habaynta doorashooyinka oo dhigaya mabada' ah in qoondo boqolkiiba 30 ah laga siiyo haweenka baarlamaanka soo socda. Eeg Alternative Africa (2019), 'Somalia women's groups push for 30 percent gender quota in legislature', March 4 (https://alternativeafrica.com/2019/03/04/somalia-womens-groups-push-for-30-percent-gender-quota-in-legislature/)

44 Mahmood O (2018), 'Women claim their place in Somalia's politics', *ISS Today*, Institute for Security Studies,14 September (https://issafrica.org/iss-today/women-claim-their-place-in-somalias-politics)

45 Human Rights Council (2016), 'Human Rights Council Report of the Independent Expert on the situation of human rights in Somalia, A/HRC/33/64 15 September.

46 Waraysi ay Saferworld la yeelatay haweenay ku metesha Baarlamaanka qaran dawlad goboleedka Galmudug, February 2020.

47 Waraysi ay Saferworld la yeelatay haweenay ku metesha Baarlamaanka qaran dawlad goboleedka Galmudug, February 2020.

48 East Africa Research Fund (2017), 'Somali Women's Political Participation and Leaderships: evidence and opportunities', EARF Policy Brief, June (https://assets.publishing.service.gov.uk/media/59b657e4e5274a5cfcda2d36/Somali_women_s_political_participation_and_leadership_Evidence_and_opportunities_Final_Policy_Briefing_Note.pdf)

49 UNSOM (2016), 'Somali religious scholars defend 30 percent quota for women' 8 December (https://reliefweb.int/report/somalia/somali-religious-scholars-defend-30-percent-quota-women)

50 Menkhaus, K (2018), 'Elite Bargains and Political Deals Project: Somalia Case Study', Stabilisation Unit.

51 Waraysi ay Saferworld la yeelatay haweenay ku metesha Baarlamaanka qaran dawlad goboleedka Galmudug, February 2020.

52 Koox haween ka tirsan qabaa'ilka laga tiro badan yahay oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Caabudwaaq, April 2019.

53 Koox rag ka tirsan qabaa'ilka laga tiro badan yahay oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Cadaado, April 2019.

54 Waraysi ay Saferworld la yeelatay oday jooga Cadaado, April 2019.

55 Koox dadka dalka gudihiisa ku barokacay ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Dhusamareeb, April 2019.

56 Waraysi ay Saferworld la yeelatay oday jooga Cadaado, April 2019.

57 Koox dadka dalka gudihiisa ku barokacay ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Dhusamareeb, April 2019.



Barta biyo qaybinta ee kutaala xerada barakacayaasha ee Damanyo, magaalada Gurieel, Galmudug.
© Maxamed Dhagacade

# 4

# Muxuu adiga kuu qabtay nidaamka federaalka ah? Is-bedelka amni, adeeg bixin iyo fagaaraha bulsho (*civic space*)

**Galmudug waxa uu ka kooban yahay toban degmo: Dhuusamareeb, Cadaado, Caabudwaaq, Balamballe, Ceeldheer Ceelbuur, Galhareeri, Koonfurta Gaalkacayoi, Hobyo iyo Xarardheere. Waxa si adkaatay in la helo xog balaadhan oo ku saabsan qaabka, shaqada iyo xilka maamulka Galmudug iyo demgooyinkiisa; tuslaae ahaan, xuduudaha rasmiga ah ee u dhexeeya degmooyinka, iyo dakhliga ay ururiso dawlad goboleedku, oo ay ka mid tahay cashuurta, miisaaniyadda laga soo wareejiyo Muqidisho, oo ku leh korjoogtayn maamulka dhexdiisa, iyo sida loogu qaybiyo dhegmooyinka.**

## 4.1 Dawlad goboleedka Galmudug: qaabka iyo xilka

Tiro aan la xaqiijin ayaa tilmaantay in miisaaniyadda Galmudug ee 2020 ay ahayd qiyaastii USD $ 17 milyan (17 milyan oo doolar). Mushaharka booliiska, ciidanka militeriga iyo sirdoonka wax intiisa badan bixiya dawladda dhexe. Waxa sidoo kale la xusay in cashuurta gegida diyaaradda laga qaado ay u tahay il dakhli oo muhiim ah Wasaaradda Maaliyadda ee Galmudug: Galmudug waxa ka jira lix gegi diyaaradeed (Cadaado, Gaalkacayo, Caabudwaaq, Dhuusamareeb, Guriceel iyo Hobyo), kuwaas oo ay maamulaan shirkado gaar loo leeyahay oo uu qandaraaska siiyay maamulka degmadu. Goobaha wax lagu baadho (*Checkpoints*) ee magaalooyinka waawayn yaal ayaa inaya ah il dakhli oo wayn. Heer degmo ahaan, cashuurta waxa sharci ahaan laga ururiyaa ganacsiyada iyo tukaamada, balse ilaa xadka la ururiyo lama cadayn karo. Waxa sidoo kale muuqata in dalwad goboleedka Galmudug iyo golayaasha deegaanadu ay ka helaan lacago badan ururada aan dawliga ahayn iyo ganacsiyada.

Tusaale ahaan, ururo aan dawli ahayn ayaa taageera dawlad goboleedka. Tusaale waxa u ah Barnaamijka Midaysan ee Maamulka Dawladaha Hoose (*Joint Program of Local Governance*), oo ay maalgelliso Hay'adda Qaramada Midoobay ee Horumarinta (UNDP), kaas oo awodda saara dhismaha wadooyinka iyo laydhka wadooyinka waawayn lagu xidho.

Hay'ado badan – gaar ahaan heer degmo – ayaan weli si ramsi ah loo dhisin ama siyaallo aan sinayn u koray. Tusaale ahaan, goobaha qaar ayaa leh gole deegaan. Cadaado iyo Koonfurta Gaalkacayo ayaa ah degmooyinka keliya ee hada leh golayaal deegaan leh, inkasta oo ay jiraan qorshayaal golayaal loogu dhisayo Caabudwaaq, Hobyo iyo Dhuusamareeb oo u dhisayo maamulka cusub ee Galmudug ee la doortay 2020. Qaababkan kala duwan ee ay u kala koreen waxa lagu xidhiidhin karaa inay hore u jiraan oo u dhismeen hay'ado ka horeeyey aasaasidda dawlad goboleedka Galmudug ee hada jira – hay'ado jiray markii uu dhisnaa mamaulkii Ximin iyo Xeeb iyo maamulkii hore ee Galmudug ee xaruntiisu ahayd Koonfurta Gaalkacayo.

# 4.2 Khilaafka iyo amaanka (*Conflict and security*)

## Hoos u dhac ku yimi khilaafka qabiiladda dhexdooda ka dhaca:

Waxaa jiray dareen guud oo dadka la waraystay (rag iyo haweenba) ay ku sheegeen in uu fiicnaaday amaanka guud ee dhamaan degmooyinka Galmudug. Tan waxa ay ku cabireen xorriyadda ay dadku isugu socon karaan iyo xidhiidhka dhex mari kara bulshooyinka kala duwan. Sida uu tilmaamay qof la taliye u ah deeq bixiye caalami ah, Galmudug malaha waa gobolka keliya ee Soomaalia ee madaxwaynaha Soomaaliya uu iska dhex gooshi karo isaga oo aan ka baqayn cabsi al Shabaab.[58] Qiyaastii qabiil kasta waxa muran kala dhexeeyaa qabiilka la deriska, gaar ahaan mid ku saabsan xuduudaha dhulka, dhul daaqsimeedka, xoolo la kala qaaday, ceelasha biyaha, dil aargoosi ah iyo muran mag.[59]

Cilmi-baadhistan uma ay suurtagellin inay xog ka soo ururiso dhulka miyiga ah, balse dadka la waraystay qaar ka mid ah waxa ay tilmaameen in xidhiidhka ka dhexeeya beelaha iyo jifooyinka hoose uu yahay mid burbursan oo xiisadi ka jirto meelaha miyiga ah islamarkaana in khilaafyada heerka hoose ahi ay yihiin kuwo miyiga ka dhaca, "gaar ahaan meelaha miyiga ah ee maleeshiyooyinka beelaha aan hubka laga dhigin ee welli khilaafyadu ka jiraan, kaas oo maamulku aanu waxba ka qaban".[60] Tan iyo markii ay burburtay dawladii dhexe ee Soomaaliya sanadihii 1990-nadii, siyaadaha amni, Nabad iyo Dib-u-heshiisiineed waxa ay inta badan ku wajahnaayeen meelaha magaalooyinka ah. Khilaafka ku saabsan dhulka, dhul daaqsimeedka iyo biyaha ee ka dhaca Balamballe, Guriceel iyo Xeraale maaha kuwo cusub oo waxa ay dib ugu noqonayaan ka hor intaan dagaalada sokeeye bilaabmin.

## Khilaafyada cusub iyo kuwa soo if-baxaya (*New and emerging conflicts*)

Dhismaha jagooyinka siyaasadeed waxa ay sidoo kale kor u qaadeen tartanka loogu jiro xafiisyada siyaasadeed: "qabiilada qaar ayaa dareemay inaanay helin samiga ay xaqa u lahaayeen oo dabadeed bilaabay khilaaf".[61] Tani waxa ay keentay in dad kala duwani ay sheegtaan inay metelaan magaalooyin iyo gobollo iyaga oo raadinaya jagooyin siyaasadeed, xitaa heer degmo. "Berigii hore oo xurriyadda la qaatay murashaxiinta waxaa lagu baryi jiray inay metelaan beelahooda, balse beryahan dadku waxa ay isku dilayaan sidii ay u metelli lahaayeen."[62] Qabiilada yaryar waxa ay isku dayaan inay ka goostaan goobo degmooyinka jira si ugu doontaan jago (*election constituency*) ama xafiis siyaasadeed – taas oo ay diidi karaan qabiiladda waawayn, taas oo, markaas, keenta mararka qaar khilaaf. Berigii hore jifadu way ku faraxsanayd hadii xubin ka tirsan beesha guud ay hesho jago siyaasadeed, balse hada waxa ay raadinayaan inay iyagu helaan metelaad, taas oo keentay tartanka oo sii xoogaysta iyo baahida loo qabo wada hadal dhex mara qabiilada iyo jifooyinka kala duwan dhexdooda. Tusaale ahaan, khilaaf ka jiray Xeraale oo ka dhexeeyey qabiiladda Dir iyo Mareexaan ayaa yeeshay weji kale sanadkii 2016 kadib markii qabiilka Dir ay waydiisteen dawladda federaalka ah inay u aqoonsato Xeraale degmo. Mareexaan ku way ka soo horjeesteen codsigaas, sababta oo ah xilligaas Xeraale waxa ay ka tirsanayd degmada Caabudwaaq – taas oo keentay dagaal ay ku dhinteen 39 qof.[63]

## Walaaca amni ee ay haweenku qabaan

Haweenku si la mid ah dadka kale ee la waraystay waxa ay amaanka ka eegayeen dhinaca qabiilka. Labada hayb ee loo arko in haweenku leeyihiin – xagga dhiiga oo aabeheed ah iyo xagga guurka oo saygeeda ah, waxa keentay raad amaan iyo siyaasadeed oo muhiim ah. qabiiladu waxa ay haweenka u arkaan wax la isku dillo oo reeruhu mararka qar waxa ay 'ku dul' dagaalaman haween, halka ay haweenku u arkaan in amaankooda shaqsi ahaan uu noqdo waxa aan mudnaanta hore u lahayn qabiilada. Labadaasi ba waxa ay caqabad ku yihiin in haweenka loo doorto inay noqdaan wakiil firfircoon bulsho ahaan iyo siyaasad ahaan. Cilmi-baadhisyo kale ayaa si qoto dheer u sahamiyay is-bedelka doorarka jinsi, xidhiidhka laba geesoodka ah ee haweenka ee ay ku leeyihiin nidaamka haybta ah ee aabaha lagu abtirsado, iyo doorka ay haweenku ka qaateen nabad dhisidda, iyo sidoo kale raadka is biirsaday ee ay rabshadaha, baro-kaca, hantida ka luntay iyo amaan darradu ku leeyihiin haweenka.[64]

## Hoos u dhaca khliaafka iyo dawladda federaalka ah

Maleeshiyooyin beeleedyo kala duwan iyo sidoo kale ciidamada Ahlu Sunna Wal Jamaaca ayaa la isugu geeyey hal ciidan oo ka tirsan Ciidanka Qaranka Soomaaliya kaas oo gacanta kaga dhigay maleeshiyooyinka kala duwan dhul badan, iyaga oo dhamaantood hoos geeyey hal talis islamarkaana isugu soo ururiyay qabiilada marshuuca amaan ee Galmudug oo dhan. Arrinkani raad ayuu ku yeeshay amaanka: tusaale ahaan, waxa meesha laga saaray jid-gooyada sharci darada ah ee ay dhigtaan maleeshiyada qabiilada, ama ashqaas hubaysan oo ka hawlgala waddooyinka muhiimka ah sida waddada wayn ee isku xidha Muqdisho iyo Gaalkacayo. Sidoo kale waxa la joogteeyey dadaal wada jir ah oo maamulada Puntland iyo Galmudug ay abuureen – tani waxa ay qaby ka ahayd heshiiskii amaan ee 2017 ay labada dawlad goboleed gaadheen islamarkaana taageero ka helay AMISOM iyo UNISOM, kaas oo ku saabsan in xuduudaha is wada jir ah looga wada hawlgallo, is-garabsi iyo xog wadaagsi maallinle ah.[65] waxa iyana jiro ifafaalo muujinaya in Cadaado iyo Caabudwaaq ay si wada jir ah u sameeyaan hawlgalo booliis oo guulaystay si ay uga falceliyaan xiisadaha xuduudahooda ee ku saabsan biyaha iyo dhul daaqsimeedka xoolaha. Tan waxa qayb ka ah in bulshadu ay masuuliyiinta xog soo siiso – inkasta oo aanuu gole deegaan ka jirin Caabudwaaq. Labadaas dadaal waxa lagu taageeray khayraad iyo awood dhis caalami ah, balse waxa uu sidoo kale ka faa'iiday Cadaado oo ka dhaxashay qaab dhismeed maamulm awood iyo khayraad maamulkii hore ee Ximin iyo Xeeb (kaas oo ku yimi isku tanaasul guulaystay oo beelaha dexmaray). Degmadani guud ahaan dembi aad u yar aya ka dhaca sida warbixinadeedu muujiyaan.

Waxa ay u badan tahay in ciidamada amaanku ay daacad u sii ahaadaan danaha qabiilka marka la barbar dhigo qaab dhismeedka dawladeed, taas oo waxyeello u gaysan karta awoodda ay u leeyihiin inay dhexdhexaadiyaan khilaafyada qabiilada ee miyiga ka dhaca. Ciidamada amaanku waxa ay badanka degan yihiin meelaha qabiiladoodu ku xooggan yihiin – tusaale ahaan, sarkaalka booliiska ah ee ka shaqeeya Xeraale waxa ay u badan tahay inuu ka soo jeedo qabiilka degan Xeraale. Tani waxa ay is-bedeshay sanadkii 2019, oo qaar ka mid ah saraakiisha amaanka ayaa hada loo diraa meello ka baxsan goobaha ay beeshoodu degan tahay, welli lama hayo xog ku fillan oo ku saabsan raadka uu arinkaasi yeeshay.[66]

Oday dhaqameedka ayaa welli ah kuwa aasaaska u ah dhexdhexaadinta iyo xallinta khilaafyada – "ma jiro dacwad ay maxkamaduhu xalliyaan hadii aanay ogolaansho ka haysan odayada dhaqanka".[67] Kalsoonida lagu qabo maxkamadaha deegaanku waa mid hoosaysa sababta oo ah waxa la aaminsan yahay inuu jiro "musuqmaasuq iyo eex", islamarkaana waxa ay ku tirisan yihiin oday dhaqameedka si ay uga caawiyaan inay fuliyaan go'aamada, maadama "oo aanu jirin awood fulineed oo wayn oo ay leeyihiin".[68] Kuwa ku lugta leh maaraynta khilaafyadu kuma koobna ciidamada qabiilka/dawladda ee waxa ay gaadhsiisan yihiin qaybta gaarka loo leeyahay (*private sector*). Jilayaasha faraha badan – qaybta gaarka ah, dawladda, qabiilka, deeq bixiyaha iyo ururada aan dawliga ahay – ee ku lugta leh bixinta amaanka iyo caddaaladda (iyo adeeg bixinta sida xagga hoose ku faah-faahsan) waxa ay dhalisay su'aalo ku saabsan is-waafaqidda (*consistency*) iyo gaadhitanka, balse sidoo kale waxa ay fursad siisay in la taageero hay'ad waxtar badan leh. Halkii lagaga tiirsanaan lahaa awoodda hal masuuliyad, in la isku keenno oo la bartilmaameedsado khayraadka ka dhexeeya kuwa badan ayaa noqon karta mid waxtar badan leh oo waaqici ah – hadii ay jiraan dano la wadaago iyo wax dheef ah oo ku jira natiijo guud oo soo baxda, nooc korjoogtayn (sida ugu fiican tahay inuu yahay mid isku dhifan (*hybrid*).

## 4.3 Bixinta adeegyada

Hoos u dhaca ku yimi dagaaladda waawayn ee dhex mari jiray beelaha iyo isku socodka bulsho ee kor u kacay, waxa lagu xidhiidhiyay (feker ahaan) inay suurtagal noqotay inay socdaalli karaan si ay u helaan shaqo iyo deegaanno amaan ah caruruta, gaar ahaan haweenka, si ay ugu safraan dugsiyada iyo hay'adaha kale ee waxbarasho. Waxa ay sidoo kale horumarisay deegaanka guud ee adeeg bixinta, barnaamijyada horumarineed iyo mashaariicda dhismaha. Dadka la waraystay waxa ay arkeen in dugsiyo iyo goobo kale oo waxbarasho la dhisay, iyada oo haweenku gaar ahaan ay tilmaameen dhismaha. Adeegyadaas guud, sida hellida dhokumentiyo rasmi ah sida shatiyada (ruqsadaha) ganacsi, shahaadooyinka dhalasho iyo baasabaroorada, ayaa ah kuwo hada laga helli karo heer degmo. Dadku waxa ay sidoo kale tilmaameen inay fiicnaatay fal-cellinta laga bixiyo xaaladaha xiisadaha sida abaartii balaadhnayd ee 2017. Qof xoolo dhaqato ah oo jooga Dhuusamareeb ayaa yidhi: "*waxa iga baxay dhamaan xoolahaygii markii abaartu jirtay, maamulku waxa uu nagu caawiyay biyo, caano iyo caawimo banii'adantinimo. Dadka ayaa sidoo kale na taageeray*".[69]

### Ilo badan oo adeegyada bixiyo

Adeegyada waxa laga helaa ilo badan: shirkadaha gaarka ah (caafimaadka, korontada, waxbarasahda, biyaha iyo is-gaadhsiinta) iyo ururro aan dawli ahayn oo caalami ah iyo kuwa maxalli ah (caafimaadka iyo adeegyada aasasiga ah) iyaga oo u marinayo hay'adaha dawlad goboleedka. Maalliyadda badan ee ku soo qulqulaysa ee ka imanaysa qaybta gaarka loo leeyahay, deeq bixiyayaasha iyo ururrada caalamiga ah ee la siinayo dawladaha xubinta ka ah federaalka waxa ay kor u qaadaan suurtagalnimada fursadaha dakhli iyo, ta ay dhasho oo ah tartanka loo galo xafiisyada siyaasadeed – iyada oo marka ay ugu xuntahay noqon karta in iyada lafteedu keento khilaaf, islamarkaana inay kala fogayso wakiiladda iyo bulshada ay metelaan. Waxa loo arkay siyaasiyiinta kuwo aan lagu 'arag" meelaha laga soo doortay, oo waxa lagu eedeeyey inay booqdaan degmooyinka xiliyada doorashada oo keliya iyo marka ay doonayaan inay ka ololeeyaan. Xildhibaanada heer qaran ayaa gaar ahaan loo arkaa "dalxiisayaal, booqda hadba meel".[70] Qarashka lagu soo galo doorashooyinka ayaa macneheedu yahay in qaar badan "ay amaahdaan lacag ay ku maageliyaan murashaxnimadooda; iyaga oo 'dakhliga' soo gala iskaga bixiya daynta ay galeen".[71] Shuruudaha iyo abaalmarinta siyaasiyiinta u tartama xafiis waxa ay ku dhiirigelisaa inay heshiisyo la galaan dadka kale ee talada gacanta ku haya (*elites*), gaar ahaan oday dhaqameedka ama shirkadaha gaarka loo leeyahay, halkii ay ku raadin lahaayeen ajandayaal horumarineed oo faa'iido u leh bulshadii soo doortay. Waxa jira ifafaalo muujinaya in dabaqadda siyaasadeed ee wakiilada la doortay ahi ay abuurayaan dano oo ay ka raadinayaan xidhiidho hogaamiyayaasha ganacsi iyo jilayaal debedeed oo ka baxsan walaacyada beelaha, oo waxa loo baahan yahay in lagu sameeyo lafo-gur dheeraad ah ilaa xadka ay ku xidhiidhsan yihiin oo ay ku tiirsan yihiin oday dhaqameedka iyo hogaamiyayaasha – iyo raadka ay ku keenni karto kuwa siyaasadda gacanta ku haya ee hada soo baxay marka laga eego xagga isla-xisaabtanka iyo horumarka dalka.

## 4.4 Udhaq-dhaqaaqa bulsho (*Civic activism*)

Cilmi-baadhisyo kale ayaa ka hadlay micnayaasha kala duwan ee ay leedahay 'bulshada rayidka ah' – oo sidoo kale ay Saferworld u taqaan jilayaasha aan dawliga ahayn[72] – ee ka shaqeeya dalka, kuwaas oo ka kooban ururo aan dawli ahayn, ururro bulshada ku tiirsan, ururada iyo hay'adaha xirfadlayaasha; waxa sidoo kale ku jira qaybta gaarka loo leeyahay, warbaahinta, xirfadlayaasha iyo oday dhaqameedka.[73] Oday dhaqameedku waxa xaqiiqdii loo arkaa inay udub dhexaad u yihiin bulshada rayidka ah ee Somalia, iyaga oo dhexdhexaadiya bulshada iyo masuuliyiinta ee arimaha bulsho iyo siyasadeed.[74] Sida xagga sare ku xusan, ururrada aan dawliga ahayn iyo ururrada bulshada rayidka ah door muhiim ah ayay ka ciyaaraan adeeg bixinta. Haseyeeshee, Soomaalida qaarkeed waxa ay u arkaan in ururrada bulshada rayidka ah ay metelaan danaha deeq bixiyayaasha.

Inta badan u dhaq-dhaqaaqayaasha madaniga ah ee aannu ku aragnay Galmudug waa kuwo ay si toos ah u sameeyeen ama ay aasaas ahaan maalgeliyaan deeq bixiyayaal caalami ah ama ururro aan dawli ahayn oo caalami ah. Gaar ahaan, waxa kor u kacay ururrada haweenka iyo dhallinyarada ee gobol kasta, inkasta oo ay ka shaqeeyaan heer deegaan. "Hada, dhallinyaradu wax walba qayb ayay ka yihiin, haweenka ayaa iyana la mid ah. Nidaamka cusub ee maamul ayaa muujiyay in cid waliba ka mid noqon karta nidaamka. Waxa ay dhiirigelisaa kooxaha kala duwan (haweenka, dhallinyarada), waxa ay u diyaarisa ka qaybgalka siyaasadda, waxa ay dhiirrigelisaa waxbarashada islamarkaana waxa ay

abuurtaa shaqo."[75] 'Fagaarayaasha bulsho' ee haweenka, oo ah meel ururada haweenku isugu iman karaan ayaa laga sameeyey degmooyinka badankooda, iyada oo ay maalgelin siiyeen deeq bixiyayaal ama ururro aan dawli ahayn sida hay'adda Maraykanka ee magaceeda la yidhaahdo United States Agency for International Development's Transition Initiatives for Stabilization. Waxa sidoo kale la sameeyey fagaarayaal dhallinyaro oo la mid ah.

## Ka soo bixidda hooska: Barlamaan-humaagga haweenka ee Galmudug

Natiijo muhiim ah oo ka dhalatay nidaamka federaalka ayaa ah samaynta 'baarlamaan-humaag ah' (eeg sanduuqa hoose), oo laga sameeyey heer degmo goobo dhawr ah oo ka mid ah Galmudug oo ay ka mid yihiin Cadaado, Dhuusmareeb, Guriceel, Caabudwaaq iyo Gaalkacayo.

Baarlamaan-humaaggu waa fagaare l muhiim ah oo ka gacan gaysta "in loo diyaariyo haweenka inay si firfircoon qayb uga noqdaan siyaasadda islamarkaana in loo awood siiyo inay u halgamaan metelaad siyaasadeed iyo jinsi."[76] Inkasta oo lagu doodi kari in baarlamaanku uu sii xoojiyo doorka guri ka shaqaynta ama daryeelka guraha ee lagu xidhiidhisiiyo haweenka – tusaale ahaan, diyaarinta shaaha iyo cuntada – fagaare xisaabta ku darasada dhaqamada bulsho islamarkaana si taas dul socota u dhiirigeliya in si cad loo qaado talaabooyin siyaasadeed waxa uu gacan ka gaysan karaa in la burburiyo ceebaynta iyo cabsida ku wareegsan haweenka qaata door siyaasadeed. Calaamado muujinayo is-bedel ayaa durba muuqda: tirada haweenka u tartamaya xulashadii golayaasha deegaanka ee 2020 aad ayay kor ugu kaceen, kuwaas oo hada u diyaar garoobaya inay u tartamaan doorashada baarlamaan ee soo socota.

Go'aan qaadashada iyo ka qaybgalka waxa welli loo arkaa mid ku dhisan qaab kala sarayn ah. Tusaale ahaan, wejiga hore ee geedi-socodka kala xulista, mruashaxu waxa uu qabtaa kullan bulshada oo dhami ka soo qayb gasho oo ay/uu ku soo bandhigto arinka, ama golaha xulista ayaa wadatashi la yeelanaya hogaamiyayaasha kala duwan ee diimeed, haweenka iyo dhallinayarada ee qabiilka murashaxu ka tirsan yahay. Haseyeeshee, go'aanka kama danbaysta ah waxa qaata oday dhaqameedka, islamarkaana sida aynu xagga sare ku soo aragnay, shuruudaha laga rabo murashaxu waxa ay u badan yihiin dhinaca in laga helo dhaqaale iyo fursad. Ururada haweenka iyo dhalinayaradu inta badan waa kuwo is-xilqaamay (mutadawiciin ah) – gaar ahaan ururrada haweenka – oo hawlaha ay qabtaan waxa ay ku wajahan yihiin abaabulka bulsahda, yaraynta

### Tusaale: Baarlamaanka-humaagga ah ee haweenka, Cadaado

Baarlamaan-humaagga ka jira Cadaado waa gudi bulsho oo madax banaan, kana kooban 20 haween ah. Ujeeddadiisu waa inay u doodaan in haweenku qayb ka noqdo go'aan qaadashada heer degmo. Waxaa sidoo kale jira guddiyo ay degmooyinku wada samaysteen oo u dooda in haweenku ka qayb noqdo go'aan qaadashada heer dawlad goboleed ee siyaasadda, iyo arimaha nolosha maallin laha ah ee haweenka saameeya. 20 ka haweenka ah waxa sidoo kale loo 'diyaarinayaa' inay qayb ka noqdaan siyaasadda, iyada oo ujeedadu tahay inay xubno ka noqdaan golayaasha deegaan ee afarta sanadood ee soo socda.

Baarlamaan-humaagga fadhigiisu yahay Cadaado waxa halkaas ka aasaasay sanadkii 2018 urur haween, islamarkaana waxa maalgeliyay ururka aan dawliga ahayn ee qaran ee Daryeel Bulsho Guud. Xubnaha waxa lagu xushay guulaha iyo ka go'naanshaha ay gaadheen intii ay qaybta ka ahaayeen ururka haweenka. Xubnaha gudidu waxa ay si dhow ula shaqeeyaan maamulka degmada Cadaado, kuwaas oo siiya wadiiqo hawlgal iyo jidwal shaqo si ay xubnuhu ula socdaan oo ay wax ugu darsadaan go'aan kasta oo maamulka degmada Cadaado uu qaato. Baarlamaanka-humaagga ah ee Cadaado waxa uu u doodaa oo ka qayb qaataa kulanada iyo isku soo baxyada dhaqan, oo ay ka mid yihiin inay wax ku darsadaan 'agabka dhaqan' oo qayb muhiim ah ka qaata isku imaatinaadaas – sida agabta shaaha, caanaha, hilibka iyo ka guryaha. Xubnuhu waxa ay sidoo kale dhiirigeliyaan in bulshadu ka qayb qaadato kulanada dhaqan ee ka dhaca degmada.

Gudidu waxa ay sidoo kale abaabushaa aqoon iswaydaarsiyo, ay ka mid yihiin doorka ay haweenku ku leeyihiin siyaasadda, ka qaybgalka iyo awood siinta haweenka. Sadex doodood ayaa ka dhacay Baarlamaanka-humaagga ah tan iyo markii laa aasaasay, kuwaas oo ku saabsanaa mawduucyadan:

1. doorka balaadhan ee haweenku ku leeyihiin go'aan qaadashada
2. waa maxay sababta gudniinka hablaha aan welli loo joojin
3. ka qaybgalka haweenk ee goobaha go'aan qaadasho ee heer deegaan, dawlad goboleed iyo heer qaran

rabshadaha, isku xidhnaanshaha bulshada iyo ilaalinta deegaanka, iyo sidoo kale hawlaha daryeelka haweenka iyo tabobarka xirfadeed. Way xadidan tahay awoodda ay u leeyihiin inay wax ka qabtan mawduucyada siyaasad ahaan xaasaasiga ah – sida doorashooyinka, xuduudaha, muranada qabiilada, ama wadaagista khayraadka, ama mawduucyada su'aal geliya qaab dhismeedyada awoodeed ee hada jira sida arimaha amni ee haweenka.

Waxa jira fursado badan oo lagu samayn karo iskaashi balaadhan iyo is-garabsi ay yeeshaan ururada bulshada rayidka ah ee heer qaran iyo heer degmo, gaar ahaan arrimaha walaacooda la wadaago iyo in la iska taageero xidhiidhka guud ee muwaadiniinta – gaar ahaan arrimaha kuwa bixiya adeegyada, amniga iyo caddaaladda. Deeq bixiyayaasha caalamiga ah iyo ururrada anan dawliga ahayn waxa ay wax ka qaban karaan arimaha la xidhiidha sida sharcinimada, isla-xisaabtanka iyo xidhiidhada ay u yeelan karaan una sii hayn karaan ururada kala duwan ee bulshada rayidka ah ee la haglamaya xoojinta dimoqraadiyadda gudohooda.[77] Tani waxa ay sidoo kale u baahan tahay in masuuliyiinta – dawladda, dhaqanka, deeq bixiyayaasha ama qaybta gaarka loo leeyahay – ay wax iska waydiiyaan doorka ay ururada bulshada rayidk ahi ka ciyaari karaan dhex-dhexaadinta xidhiidhka bulshada dhexdeeda.

## Qoraalo kooban

58 Waraysi ay Saferworld qaaday, March 2020.

59 Hore ayay u dagaalameen ku dhowaad dhamaan qabaa'ilka oo dhan iyo gaar ahaan kuwa xad wadaagga. Muranada qabaa'ilka ka dhex jira ee la ogaaday waxa ay uu ka dhex jiraa: Saleeban (oo degan Cadaado) iyo Mareexaan (degan Dhabad); Sacad (degan Gallinsoor) iyo Saleebaan (degan Cadaado); Mareexaan (degan Balamballe) iyo Cayr (degan Guriceel); Dir (degan Xeraale) iyo Mareexaan (degan Caabudwaaq); Cayr (degan Dhusamareeb) iyo Duduble (degan Ceelbuur).

60 Koox dhallinyaro ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Caabudwaaq, April 2019.

61 Koox odayo ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Xeraale, April 2019

62 Koox dhallinyaro ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Cadaado, April 2019.

63 Khilaafka waxa lagu xallilay nidaamka xeer dhaqameedka Soomaalida: 'Wada xaajoodka iyo bixinta magta 39 qof oo ku dhintay dagaalka waxa hogaaminayay oday dhaqameedka islamarkaana waxa bixiyay dadka degan Cadaado (waxa ay ahayd arin aan caadi ahayn in qabiil ka baxsan muranku uu bixiyo magta); taasi waxa ay dhashay in la dhameeyo khilaafka. Koox odayo ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Xeraale, April 2019.

64 Gaar ahaan eeg: Gardner, J. and Warsame, A. M. eds. (2004) *Somalia – the Untold Story: The War through the Eyes of Somali Women* (London: Pluto Press), As well as: UNDP (2012), 'Gender in Somalia' Brief. UK Home Office (2018), 'Country Policy and Information Note Somalia: Women fearing gender based violence', April; Rayale, S, Pomfret E, and Wright D (2015), 'Somali Solutions: Creating conditions for a gender-just peace', Oxfam research reports, August; AU/UN IST (2016), 'Somali Women's Participation in Politics and Public Life, AMISOM, November 15; Gardner J & El-Bushra, J. (2017) 'Somalia: A state of male power, insecurity and inequality', Rift Valley Institute, *Impact of War on Men Briefing Paper* 2, March.

65 UNDPA (2017), 'Sustaining Peace in Somalia: Reconciliation in Gaalkacyo', *Politically Speaking 2017 in Review*, December.

66 Tani waxa ay khuseeysaa booliiska caadiga ah, maadama oo saraakiisha ka tirsan hay'adaha sirdoon ee federaalka ama Sirdoonka Qaranka (NISA) ay ka tirsan yihiin qaba'il kala duwan.

67 Koox dhallinyaro ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Gaalkacayo, April 2019.

68 Waraysi ay Saferworld oday dhaqameed jooga Gaalkacayo, April 2019.

69 Waraysi ay Saferworld la yeelatay oday dhaqameed jooga Dhusamareeb, April 2019.

70 Koox rag ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Cabudwaaq, April 2019

71 Tixraaca hore (Ibid).

72 Sanadkii 2007, Saferworld, oo ogsoon in qaabka loo abla-ableeyo bulshada rayidku ay noqon karto mid aan ka turjumayn duruufta Soomaaliya, waxa ay dooratay inay isticmaasho "jilayaasha aan dawliga ahayn (non-state actors (NSAs)'. Eeg: (https://www.saferworld.org.uk/resources/news-and-analysis/post/775-the-role-of-civil-society-in-somaliaas-reconstruction-achievements-challenges-and-opportunities

73 Gundel, J and Allen, S (2017),'Civil society and civic engagement in accountability in Somalia'. Katuni/IAAAP

74 Osman F (2018), 'The role of civil society in Somalia's reconstruction: achievements, challenges and opportunities', Saferworld, June

75 Koox haween ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Cadaado, April 2019.

76 Koox haween ah oo ay Saferworld meel iskugu keentay si su'aalo loo waydiiyo (focus group discussion), Cadaado, April 2019.

77 Osman F (2018), 'The role of civil society in Somalia's reconstruction: achievements, challenges and opportunities', Saferworld, June.




**Garoonka caalamiga ah ee Adaado, Adaado, Galmadug.**

**© Maxamed Dhagacade**

# 5

# Gabo-gebo

**Nidaamka federaalka ah oo guud ahaan ah mid loo qaatay si loo qanciyo danaha qabiilka, waxa nidaamka federaalka ee Soomaaliya uu kobciyay is-aqballida siyaasadeed ee ka dhex jirta qabiilada, balse ma uu noqon gaadiidkii dib-u-heshiisiinta qaran lagu gaadhi lahaa.**

Dawlad goboleedka Galmudug waxa uu jira wax ku dhow afar sanadood keliya, oo waxaa cad in dhismaha dawlad goboleedku ay tahay shaqo socota oo u baahan in hadba dib loo wada hadlo (*re-negotiation*) iyo isu imaatin wada hadal oo ka dhex dhaca cidaha awoodda leh ee kala duwan. Waxyaabaha uu ku fiican yahay iyo waxyaalaha uu ku liito nidaamka federaal ee Galmudug waa kuwo cad: waxa dhismay qaab-dhismeed maamul oo, aragti ahaan, dadwaynaha ku soo dhowayn kara adeegyada, balse waxa uu ku tiirsan yahay masuuliyiin iyo hay'ado kale oo kala duwan oo aan dalwi ahayn si uu xilkaas u qabto; waxa lagu heshiiyay nidaam siyaasadeed oo si aan hore loo arag u siiyay metelaad siyaasadeed dhamaan qabiilada Galmudug, balse sii qoto dheereeyey caqabadaha bulsho ee hortaagan haweenka, beelaha la hayb sooco, iyo da' yarta; iyo waxa la dhisay qaab-dhismeedyo iyo geedi-socod federaal 'hoosta laga bilaabay kadibna kor u socday' islamarkaana xoojiyay hay'adaha iyo hannaanka kala sarayn ee qabiil ee hada jira, balse habraacyadiisa, xilka iyo geedi-socodkiisa waxa hadheeyey mad madow iyo daah-furnana la'aan. Inkasta oo federaalku uu kobciyay isu tanaasulka beelaha, hadana waxa uu sii xoojiyay khilaafyada hore u jiray iyo kuwa cusub.

## Ku saabsan Saferworld

**Saferworld waa urur caalami ah oo madax banaan kana shaqeeya ka hortagga khilaafka gacan kahadlka weheliya, iyo dhisida nolol ammaan ah. Waxaaan la shaqeynaa dadka uu saameeyey khilaafka si loo horumariyo badbaadadooda iyo dareenkooda amni, taas oo sal ku leh cilmi baaris ballaaran iyo falanqeyn oo qasadkeedu yahay hagaajinta degaanka, siyaasadaha qaranka iyo kuwa caalamiga ah, iyo dhaqamada gacan ka geysan kara dhismaha nabad waarta. Ahmiyadeena ayaa ah dadka – waxaan aaminsanahay adduun qof waliba uu ku hogaamin karo nabad, nolol qanacsan, kana madax banaan cabsi iyo amni daro. Waxaan nahay urur aan macaash doon ahayn oo ka shaqeeya 12 dal iyo dhulal ku baahsan Afrika, Aasiya iyo Bariga Dhexe.**

SAFERWORLD

UK OFFICE
The Grayston Centre, 28 Charles Square
London N1 6HT, UK

Phone: +44 (0)20 7324 4646
Email: general@saferworld.org.uk
Web: www.saferworld.org.uk

www.facebook.com/Saferworld
@Saferworld
Saferworld

Registered charity no. 1043843
A company limited by guarantee no. 3015948

ISBN 978-1-912901-23-4

